# Hanaanka Federaalka iyo Xukun Baahinta

# Khiyaaraadka u Furan Soomaaliya

WARBIXIN SHIRHAWLEED
27-29 Nofembar, 2008
Nairobi, Kenya

# Mahadcelin

Waxaan mahad u celinaynaa Raiisalwasaarahii hore, Mudane Nuur Xasan Xuseen, iyo Guddoomiyahii Golaha Dhexe ee Isbahaysiga Dib-Uxoreynta Soomaaliya (ARS), Mud. Shariif Xasan Sheekh Adan, sida ay shirka ugu ololeeyeen.

Waxaan sidoo kale doonaynaa inaan mahad u celino dhammaan ururada ka dhigay shir hawleedkan mid guuleysta, oo kala ah deeqbixiyeyaasheena, Wakaaladda Dowladda Malaykanka ee Horumarinta Caalamiga (USAID), Waaxda Horumarinta Caalamiga ee Dowladda Ingiriiska (DFID), Dowladaha Sweden, Norway, Denmark iyo hay'adaha kale ee aan wada shaqeyno : Machadka Max Planck ee Isbarbardhigidda Qaanuunka Guud iyo Qaanuunka Caalamiga (MPIL).

Waxaa lama ilaawaan ah qaybtii deeqsiga ahayd ee ay arrintan ka qaateen xeeldheereyaal isugu jira kuwo Soomaali ah iyo caalami ah oo ka kala yimid cirifyada dunida. Mawaadiicda kala duwanayd iyo dooddii cilmi wadaaga ahayd marnaba iyaga la'aantood ma dhici kareen. Sidoo kale ka qaybgalayasha waxaan uga mahdinaynaa doodihii maskax kiciska ahaa ee ay dadka kaga qayb galeen ee sii kordhiyay xiisaha loo qabay falanqaynta arrimaha shirku diirada saarayay. Ugu dambayntiina, kala duwanaanta ka qaybgalayaasha, oo badankoodu ay Soomaali ahaayeen iyo is xilqaankoodii ay isu xilqaameen in ay cilmibaaris ku sameeyaan khiyaaraadka hanaanka federaalka iyo baahinta xukunka u furan Soomaaliya, taasoo ku dhammaatay arrimo wax ku ool ah ee warbixintan lagu soo koobay ayaa iyaduna xusid mudan.

Waxaa kaloon Xafiiska Siyaasadda ee Qarammada Midoobay u Qaabilsan Soomaaliya (UNPOS) oo uu hoggaamiyo Ergeyga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qarammada Midoobay (SRSG), Danjire Axmed Wald Cabdallah, ugu mahdinaynaa taageerada uu siiyay shirka. Waxaa kaloon Barnaamijka Horumarinta Qarammada Midoobay (UNDP) Soomaaliya, oo uu hoggaamiyo Mark Bowden, oo ah Isu-duwaha Qaramda Midoobay iyo Hawalaha Baniaadannimada iyo Bruno Lemarquis, oo ah Agaasimaha UNDP Somalia ugu mahdinaynaa fulinta shirka.

Waxaa si gaar ah xusid u mudan kooxda UNDP Soomaaliya ee ay hoggaamiso Mw. Annie Demirjian, oo ah maamulaha Barnaamijka Xukunwanaagga, iyo kooxdeeda farsamo ee Frances Kinnon iyo Moe Xuseen. Dadaalkii iskuxir ee Debbie Wandera, Said Ahmed iyo Gladys Ng'ang'a, oo si ma daalnimo ah ugu shaqeeyay oo mar walbana baahida ka qaybgalayaasha u dheganuglaa. Waxaan Khalif Farah iyo Omar Mohamed ugu mahadinaynaa tarjamadii ay bixiyeen iyo qoraalkii ay ka qoreen shirka. Warbixinta ugu dambeysa waxaa qoray waxgaradka Soomaaliyeed, Dr. Alim Abdulkadir, Dr. Abdinoor Abdullahi, Jill Ghai iyo Mw. Varsha Redkar-Palepu, oo ah siihayaha Mashruuca Kaalmaynta Dastuur Samaynta Soomaaliya.

# Jadwalka Tusmada


Garwaaqsiyo ......ii

Hordhac ......iii

Liiska ereyada la soo gaabiyay ......iv

Koobida nuxurka shirka ......1

Taariikhda iyo xaaladda ka dambaysa shirka ......2

Mawaadiicda doodaha ......3

1. *Hababka dowladda-Federaalka, dowlad midaysan iyo habab kale ......3*
2. *Xaqiiqada qabiilka –Saameynta uu ku leeyahay mustaqbalka nidaamka dowladda ......4*
3. *Federaalka Maaliga: Khiyaaraadka iyo saameynta ......5*
4. *Sameynta guddiyada Cahdiga ku jira: Xudduudaha, doorashada, Tirakoobka & ururinta maclumaadka ......6*
5. *Hay'adaha fulinta, sharcidejinta, garsoorka, federaalka, kuwa dowlad midaysan iyo maamul baahsan ......8*
6. *Nidaam dowlad ee habboon: Saameynta uu mid walba u leeyahay Soomaaliya ......9*

Natiijooyinka iyo saameynta ......11

1. *Talooyin: Hababka dowladda- federaal, midaysan iyo nidaamyo kale ......11*
2. *Talooyin: Xaqiiqada qabiilka – saameynta uu ku leeyahay mustaqbalka nidaamka dowladda ......11*
3. *Talooyin: Federaalka maaliga-khiyaaraadka iyo saameynta ......12*
4. *Talooyin: Saameynta guddiyada ku jira Chadiga –Xudduudaha, doorashada & tirakoobka ......12*
5. *Talooyin: Hay'adaha fulinta, sharcidejinta, garsoorka, federaalka, midaysan & maamul baahsan ...... 13*
6. *Talooyin: Niddamyada dowladeed ee habboon & saameynta ay Soomaaliya u leeyihiin ......13*

Talooyinka ka soo baxay kooxaha shaqo ......14

Waddada horey loogu soconayo ......16

LIFAAQYADA ......17

*Lifaaqa 1aad: Ajendaha ......17*

*Lifaaqa 2aad: Liiska ka qaybgalayaasha ......22*

*Lifaaqa 3aad: Diiwaanka shirka iyo warqadihii la jeediyay ......25*

# Hordhac

Warbixintani waxay soo bandhigaysaa aragti Soomaaliyeed oo ka soo baxday dooda koowaad ee khiyaaraadka xukuumadeed ee ku saabsan federaalnimada/baahinta maamulka oo Soomaaliya u furan. Dukumiintigu wuxuu bixinayaa fiiro welwel leh, caqabado iyo rajada muwaadiniinta Soomaaliyeed, oo ay qurba joogtu ka midyihiin.

Macluumaadka ku qoran warbixintan waxay ka jawaabaysaa su'aalo ay ka mitahay: Waa maxay nooca xukuumadda (federaal, maamul baahsan ama maamul midaysan) ee ku habboon Soomaaliya? Sidee bay qaybaha kala duwan ee bulshada Soomaaliyeed, oo ay qurbajoogtu ka midtahay uga qaybqaadan karaan wadahadal iyo dood qarameed oo laga yeesho khiyaaraadka ama hababka ugu wanaagsan ee u furan Soomaaliya? Warbixintan, waxay UNDP Soomaaliya ka soo ururisay wadahadalladii iyo doodihii ka dhacay magaalada Nairobi ee dalka Kenya bishii Nofembar 27keeda iyo 29keeda ee 2008 oo ay ka qaybqaateen ku dhowaad dad gaaraya 100 qof oo Soomaali ah oo laga soo xulay Dowladda Federaalka Ku Meelgaarka ah (TFG) iyo Isbahaysiga Dib-Uxoreynta Soomaaliya (ARS), khubaro ku xeeldheer qaanuunka, dastuurka iyo Shareecada Islaamka, culimo, madax bulsho iyo xubnaha wadaaga isutagga Mashruuca Kaalmaynta Dastuur Samaynta Soomaaliya (SCMSP).

Ka qaybgalayaasha shirkan oo badankoodu aanu is arkin in mudddo ah, waxay is weydaarsadeen welwelka qotoda dheer ee ay ka qabaan mustaqbalka Soomaaliya. Hase yeeshee, waxay muujiyeen aragti midaysan oo ah in Soomaalidu, kuwa dalka gudihiisa ka yimid iyo qurbajoogtaba, ay isbeddel keeni karaan. Ergooyinku waxay shirka yimaadeen iyagoo diyaar ah. Sidaa darted, talooyinkii ay soo jeediyeen saddexdii kooxood ee loo xilsaaray inay ka soo shaqeeyaan waxay ahaayeen kuwo wax dhisaya oo wax ku ool oo si fiican looga soo fikiray.

Barnaamijka Horumarinta Qarammada Midoobay  iyo bulshada caalamku wax badan ayay ka barteen dadkan kala duwan ee metelayey bulshada Soomaalida. Dhammaadkii shirka UNDP waxay ballanqaaday in shirku uu yahay kii ugu horeeyay ee doodo taxana ah, oo ka dhacaya dalka gudihiisa iyo dibaddiisaba, iyo in sannadka 2009 la qorshayn doono shir hawleedyo si qoto dheer looga doodi doono arrimo badan oo hore usii ambaqaadaya arrimihii shirkan lagu falanqeeyey iyo talooyinka laga soo jeediyay. Waxaa kaloo la isku afgartay in mustaqbalka bulshada madaniga, bulshoweynta, hoggaamiye diineedyada iyo dhallinyarada iyo ururada haweenka laga qaybgeliyo doodaha.

Annie Demirjian



UNDP Agaasimaha Barnaamijka
Maamul wanaagga
Diisembar 2008

# Liiska Ereyada la soo Gaabiyay

| | |
|---|---|
| ARS | Alliance for Re-Liberation of Somalia |
| AMISOM | African Union Mission In Somalia |
| A.U | African Union |
| CKRC | Constitution of Kenya Review Commission |
| DFID | Department for International Development |
| EC | Electoral Commission |
| EMB | Electoral Management Body |
| EU | European Union |
| IFCC | Independent Federal Constitution Commission |
| IGAD | Inter-governmental Authority on Development |
| MPIL | Max Planck Institute for Comparative Public Law and International Law |
| NDI | National Democratic Institute |
| PCC | Parliamentary Constitutional Committee |
| SCMSP | Somalia Constitution-Making Support Project |
| SRSG | Special Representative of the UN Secretary-General |
| TFC | Transitional Federal Charter |
| TFG | Transitional Federal Government |
| TFP | Transitional Federal Parliament |
| TRC | Truth and Reconciliation Commission |
| UN | United Nations |
| UNDP | United Nations Development Programme |
| UNPOS | United Nations Political Office for Somalia |
| USAID | United States Agency for International Development |

# Nuxurka Shirka Oo Kooban

Shirkan waxaa ka soo qaybgalay Ra'iisalwasaaraha Soomaaliya Md. Nur Xasan Xuseen, iyo Guddoomiyaha Guddiga Dhexe ee ARS Md. Shariif Xasan Sheekh Adan, iyo Soomaali kale oo badan oo 33 ka mid ah ay markaa deganaayeen meelo Soomaaliya ka mid ah, 29 kalena lagu magacaabi karo Soomaalida qurba joogta ah, in kastoo ay ku hawlanyihiin arrimaha Soomaaliya. Waxaa kaloo ka qaybqaatay 25 qof oo ah xoghayn ama kaabid oo 14 ka mid ihi ay qudhoodu Soomaali ahaayeen iyo 2 xubnood oo ka socday bulshada Soomaaliyeed ee reer Kenya.

Ujeeddooyinka shirku waxay ahaayeen in si dhab ah loo darso waxyaabaha ka dhalanaya qodobada Axdiga Federaalka Ku Meel Gaarka ee la xiriira su'aalaha ama mabaadi'da federaalnimada/baahinta maamulka. Gaar ahaan, ujeeddadu waxay ahayd in la baaro dabeecada "nidaamka federaalka" iyo "maamul baahinta" iyo sida loo maareyn karo xaaladaha gaarka ah ee Soomaaliya, iyadoo la doonayo in la soo saaro soo jeedin wax ku ool ah si loo dhaqangeliyo Axdiga. Waxaa si gaar ah diiradda loogu qabtay in la sameeyo dastuur kama dambeys ah, sida uu Cahdigu dhigayo. Ahamiyad taariikheed ahaana, shirku wuxuu dhacay kadib heshiiskii nabadda dhowaan Jabuuti lagu gaaray, kaasoo keenay rajo iyo billow cusub iyo horumar in laga gaaro ujeeddadii ahay in dastuur cusub la sameeeyo.

Shirka waxaa loo qorsheeyey si Soomaalida ka soo qaybgashay la siiyo fursada ugu ballaaran ee ay fikradahooda uga dhiiban karaan arrimahan ugana doodaan. Muxaadarooyinka rasmi ahaanta loo soo jeediyay waxaa raacay faalloyinka iyo doodo ka qaybgalayaashu (inta badanna ay ka mid yihiin ugu yaraan hal qof oo Soomaali ah oo u jawaaba) ay isweydaarsadeen iyo fursad la siiyay in su'aalo la weydiiyo dadka muxaadarooyinka soo jeediyay iyo faallooyin lagu soo jeediyo. Muddo 24 saacadood ah ayaa loo qoondeeyay doodo ay ka qaybqaataan kooxo Soomaali ah, iyadoo si gooni ah loo tixgelinayo dhinacyada ugu muhimsan.

Ugu dambeyntiina, shirku wuxuu dibadda u soo saarayaa welwelka, arrimaha iyo talooyinka ay soo jeediyeen – ka qaybgalayaasha Soomaalida ah keligood – oo kaga jawaabeen muxaadarooyinkii la soo akhriyay. Gaar ahaan, muxaadarooyinka (oo ahaa ilo macluumaad oo hodo ah) waxaa weheliya macluumaad kale iyo faahfaahin dheeraad ah, taasna akhristuha wuxuu ugu noqon karaa warbixinta dhamaystiran. Sidoo kale, faahfaahinta qabanqaabiyeyaasha iyo mawaadiicdooda waxaa laga heli karaa ajendaha shirka, oo ku lifaaqan warbixintan. Dokumiindiga ama warbixinta shirka dhamaystiran waxxa ku jira faahfaahin dhamaystiran ee soo jeediyeyaasha iyo soo jeedintooda ama warqadihii ay soo jeediyeen. Taasna waxaa laga heli karaa UNDP. (eeg Lifaaqa 3)

## Qeexidda ereyada muhimka ah

**Hanaanka aan sinnayn:**
Macnaheedu waxaa weeye in hay'adaha kala duwan ee xukuumadda oo la filayey inay isku heer ahaadaan oo leh awoodo kala duwan.

**Madaxbannaani:**
Waxay tilmaamaysaa in awood loo yeesho in go'aan la gaaro, arrimo muhimsana la kala hormarin karo, iwm. Waa qayb muhim ah oo ka mid ah hanaanka federaalka, laakiin xoogaa madaxbannaani ah way ka jiri kartaa nidaam xukun oo aan federaal ahayn (eeg hanaanka aan sinnayn).

**Hanaanka konfederayshinka:**
Waa isutag isu keena gobollo ama dowlado siyaasadeed oo isutagga uga tanaasula qayb ka mid ah awooddooda. Dowladda wadaagga waxay ka kooban tahay ergo ka kala socota gobollada ama dowlad gobolleedyada.

**Baahin xukun:**
Wuxuu koobayaa arrimo badan oo suurto gelinaya in hawlaha xukuumadda iyo xataa laga yaabaa awoodda

sharci laga qaado caasimadda qaranka. Hanaanka federaalku waa nooca ugu xagjira ee maamul baahinta, dowladaha hoosena waa nooc caan ah. Hadba inta ay la egtahay inta la baahinayo aad baa loogu kala duwan yahay. Baahinta maamul waxay keenaysaa in hawlaha iyo awoodaha sharci lagu maamulo gobollada sharciga lagu dhaqmana ahaadu mid qaran.

**Maamul Furfurid:**

Waa baahin xukun, ooay ka mid tahay in sharci la sameeyo. Laakiin awooddaas waxaa la noqon kara xukuumadda dhexe/qaran.

**Xilsaarid/Ergeyn:**

Waa in awooddii caadi ahaan dastuurka qaranku ama sharcigu siin lahaa hay'ado xukuumadeed la siiyo heer xukuumad oo kale (badanaa mid hoose) ama hay'ado kale. Badanaa waxaa loo sameeyaa dano maamul awgeed.

**Kala fogeyn:**

Waa kala fogeynta xafiisyada iyo shaqaalaha qaranka, iyadoo gacantana lagu hayo heer qaran.

**Hanaanka Federaalka:**

Waa qaybinta dalka loo qaybiyo gobollo oo mid walba uu yeesho xukuumaddiisa oo leh awoodo gaar ah. Dowladda dhexe ama dowlad goboleedyadu keligood ma beddeli karaan dabeecadda ama awoodda kuwa kale.

**Federaalka maaliga:**

Wuxuu tilmaamayaa dhinaca maaliga ama lacageed ee hanaanka federaalka: heerkee dowlad baa ururiya dakhliga ama canshuurta iyo sidee baa dakhliga loogu qoondeeyaa hay'adaha kala duwan si ay u isticmaalaan.

**Dowlad midaysan:**

Ma aha federaal – dowlad aan lahayn gobollo madaxbannaani gaar ah leh.

# Taariikhda iyo Xaalada ka Dambaysa Shirka

Qodobka 11 (4) ee Cahdiga Federaalka Ku Meel Gaarka wuxuu tilmaamayaa *"Dowladda Feeraalka Ku Meel Gaarka waxay xaqiijinaysaa in hawsha lagugu federaalaynayo Soomaaliya ay ku dhacdo muddo laba sanno iyo bar ah gudaheed laga billaabo taariikhda la dhisay Guddiga;"*

Bishii Maayo ee 2006 Xafiiska Siyaasadda ee Qaramada Midoobay ee Soomaaliya (UNPOS), isagoo la kaashanaya Xafiiska Guddoomiyaha Baarlamaanka Federaalka Ku Meel Gaarka ee Soomaaliya (TFP) wuxuu magaalada Baydhabo, ee Soomaaliya, baarlamaanka ugu qabtay siminaar shan maalmood socday oo ku saabsanaa hanaanka federaalka iyo arrimaha dastuurka. Mowduuca laga dooday wuxuu ahaa "Hanaanka Federaalka – Habka iyo sida awoodaha iyo khayraadka loo wadaago", waxyaabaha la filayay inay ka soo baxaan siminaarkaasna waxaa ugu muhinsanaa in xildhibaanadu ay "wax ka bartaan habdhismaha xukuumad federaali ah, iyo weliba arrimo muhimsan oo dastuuri ah, sida mabda'a kala saaridda awoodaha, furfuridda awoodaha, nidaam xukuumadeed oo baarlamaani iyo mid madaxweynenimo, iwm."

Iyadoo la eegayo heshiiska nabadda ee dhowaan Jabuuti lagu gaaray iyo hawsha dastuur sameynta ee socota, Soomaalida go'aanka sameysa waxay aqoonsadeen baahida loo qabo in la qabto shir looga doodo 'Khiyaaraadka Nidaamka Federaalka iyo baahinta maamulka ee Soomaaliya u furan'. Shirkan waxaa taageeray oo go'aansaday qabanqaabadiisa UNPOS iyo UNDP.

## Ujeeddada kulan hawleedka

Ujeeddada kukuan hawleedka waxay ahayd in lagu martiqaado dadka sameeya go'aamada siyaasiga, kuwa ku xeeldheer mawaadiicda laga doodayo (culimada arrimaha federaalka, dastuurka, sharciyaqaanada, dhaqaaleyahanada, cilmiga bulshada, iwm.) oo ka kala yimaada Soomaaliya iyo qurbajoogtaba, si ay arrinta uga yeeshaan dood qotodheer oo ay arkaan khiyaaraadka wax ku oolka ah oo la doonayo oo ay qiimeeyaana habka xukuumadeed – ha ahaado mid federaal ah, mid midaysan ama kuwo kaleba – ee ku habboon Soomaaliya .1

## Natiijada ka soo baxday iyo midda la filayay

Waxaa la sameeyay seddax koox shaqo si ay u diyaariyaan qorshe shaqo ee si qotodheer dib loogu eegayo talooyinka ugu muhimsan ee shirka. Talooyinkii ay soo saareen kooxahan shaqo waxas loo gudbin doonaa Guddiga Sare ee durbaba lagu sameeyay heshiiskii Jabuuti.

## Soo jeediyeyaasha:

Xeerdheerayaal Soomaali iyo caalamiba leh.

## Qabanqaabiyeyaasha/Dood Horwa-dayaasha:

Xeerdheerayaal Soomaali ah.

## Ka qaybgalayaasha:

Ra'iisalwasaaraha, wasiiro, xildhibaano, Guddiga Federaaliga ee Dastuurka ee Madaxbannaan (IFCC) iyo dad kale oo daneynaya arrimaha dastuurka ka leh oo ka socda qurbajoogta, Qaramada Midoobay (UN), iyo xeeldheereyaal caalami ah – oo ku dhow 70 qof.

> "Anigoo ku hadlaya magaca ka qaybgalayaasha shirka Nairobi ee Nidaamka Federaalka iyo Baahinta maamulka: Khiyaaraadka u furan Soomaaliya, waxaan jecelahay inaan ku mahadiyo shaqaalaha UNDP Somalia dadaalka ay ku bixiyeen sidii shirku u guuleysan lahaa. Runtiina wuxuu ahaa shir guul soo hoayay iyadoo la eegayo sida ay u kala duwanaayeen khibradaha ka qaybgalayaasha, iyo rabitaankooda inay diiradda saaraan hawsha hor taalla iyo rabitaanka dadkoo idil inuu shirku guuleysto".
>
> **Somali Diaspora participant**

[1] Afeefasho: Fikrada halkan lagu diibtay waxaa iska leh dadkii qoray ama soo jeediyayee qasab maaha inay ka tarjumaan fikrada Qaramada Midoobay

# Mawaadiicda Doodaha

Qaybtan waxay soo koobaysaa doodihii kulan hawleedka 'nidaamka federaalka iyo baahinta maamulka: khiyaaraadka u furan Soomaaliya. Dooduhu waxay xooga saareen lix arrimood oo la xiriira dowlanimada; oo ay ka mid yihiin:

a. Hababka dowladnimada, sida federaalka, dowlad midaysan iyo hababka kale,
b. Xaqiiqada qabiilka iyo saamaynta uu ku yeelanayo nidaamyada dowladda ee mustaqbalka,
c. Federaalka maaliga – khiyaaraadka iyo wixii ka dhasha,
d. Saameynta Guddiyo uu Cahdigu dhigayo in la sameeyo - Xudduudaha, Doorashada, Tirakoobka & Ururinta macluumaadka,
e. Laanta Fulinta, Sharcidejinta, Garsoorka, hay'ada federaalka, midaysan, maamul baahsan leh,
f. Nidaamyo xukun ee habboon, oo uu ka mid yahay federaalka iyo saameynta mid kasta uu ku yeelanayo Soomaaliya.

Mid kasta oo lixdan dhinac ka mid ah fadhi gaar ah ayaa looga dooday. Waxaanan hoos ku soo koobaynaa wixii ka soo baxay doodihii balbalaaraa ee dhinacyada badan taabanayay.

## I. Hababka dowlanimada: Federaalka, dowlad midaysan iyo habab kale

Fadhigan waxaa lagu soo bandhigay dulmar guud ee federaalka, dowlad midaysan iyo hababka kale ee dowlanimo iyo sida loogu dhaqmo Afrika iyo gobollo kale. Fadhigu wuxuu sharax ka bixiyay faa'idooyinka iyo iinnooyinka ay leeyihiin hababka kala duwan iyo ka ku habboon Soomaaliya.

Md. Cumar Salaad oo soo jeediyay isbarbardhiga khiyaaraadka hanaanka federaalka iyo ka midaysan wuxuu doorbiday nidaam midaysan. Wuxuu yiri nidaam midaysan oo leh maamul baahsan oo ay gobolladu leeyihiin awoodo madaxbannaan oo lagu dammaanaqaaday dastuurka ayaa ah nidaamka dowladnimo ee ugu habboon in lagu dhaqmo Soomaaliya. Sababtuna waxaa weeye; a) Soomaaliya waa dal dadkiisu isu wada egyihiin, b) arrimaha muranka dhulka, c) dib u soocelinta iyo iskuhaynta dowlad iyo hay'ado dhexe ee qaran oo xoog leh, d) difaac qaran oo xoog leh, e) siyaasad qaran ee jinsiyadda iyo socdaalka midaysanyihiin, f) siyaasad qaran ee dhaqaale iyo maaliyadeed, iyo g) siyaasad dibadeed qaran oo xoog leh.

Dr. Markus Böckenförde, oo soo jeediyay muxaadaro ku saabsanayd nidaamka federaalka iyo sifooyinka qaanuuneed ee dowladaha federaalka iyo kuwa midaysan, wuxuu caddeeyey sida awoodaha dowladda ay u qaybsan karaan heerarka kala duwan ee dowladda looguna furfuri lahaa heerarka hoose, iyadoo la kala saarayo awoodaha sharcidejinta, fulinta iyo garsoorka si qotoman iyo si toosanba. Dooddiisu waxay taageero siisay ku dhaqanka Cahdiga Federaalka Ku Meel Gaarka (TFC) oo xal caqligal ah u noqon kara dhibaatada xukunka Soomaalia. Hanaanka federaalka ayya la doorbiday, maxaa yeelay wuxuu matalaad siin karaa danaha dowlad goboleedyada ay ku leeyihiin baarlamaanka qaranka. Nidaamka Federaalku si wanaagsan ayuu u shaqeeyaa haddii mas'uuliyaadka heer walba ee dowladda lagu qoro dastuurka oo hab garsoorna loo dejiyo. Waxaa la soo jeediyay in hanaanka federaalku uu yahay khiyaar hoos loogu dhigo daryeel la'aanta iyo si xun u isticmaalidda awoodda, taasoo ka jirtay nidaamyada



## Mabaadi'da asaasiga ee Nidaamka Federaalka

1. Ugu yaraan laba heer ama "hab" dowladeed, mid walbana uu leeyahay sharciyaddisa iyo nidaamka maamulkiisa. Hal heer wuxuu ka koobanyahay dowladda qaranka, ka kalena waa ugu yaraan laba dowlad goboleedyo.
2. Heer walba wuxuu leeyahay awoodo aanu heerarka kale soo faragelin karin.
3. Awoodaha waxaa lagu caddeynayaa dastuurka, mana jirto dowlad heer kasta ha ahaatee wax ka bedeli karta iyadoo ogollaansho ama iskaashi laga helin heerarka kale.
4. Mar walba waxaa jira aqal labaad ee baarlamaanka qaranka oo dowladaha heerarka labaad ama dadkooda si uun sidaa loogu metelo.
5. Waa inuu jiro hab dhismeed lagu dhexdhexaadiyo muranka ka dhasha awoodaha iwm, oo dhexmari kara dowladaha awood qaybsiga awgiis (inta badanna taasi waxay noqotaa Maxkamadda Sare ama Maxkamadda Dastuuriga).

dowladda midaysan ee Soomaaliya ka jirtay muddadii ka horeysay dagaalkii sokeeye. Ka qaybgalayaasha waxaa laga codsaday inay u fiirsadaan bal in nidaam federaal ah uu Soomaaliya ka taageeri karo inay gaarto ujeeddadeeda, oo aan loo aqbalin nidaam federaal ah Cahdiga Federaalka Ku Meel Gaarka ayaa sheegay darteed oo keliya.

Ka qaybgalayaasha kulan hawleedka waxaa la siiyay dhowr fursadood oo ay jawaabo kala duwan uga bixiyaan muxaadarooyinkii ku saabsanaa hababka xukunka. Ka qaybgalayaashu waxay talo ku soo jeediyeen in loo baahanyahay in waanooyin haga oo kala guur ah dastuurka lagu kordhiyo si ay u hagaan kala guurka laga tagayo hab xukunkii hore oo loo guurayo ka cusub si la isaga ilaaliyo awoodaha lagu murmo.

Ka qaybgalayaal badan waxay taageereen nidaam dowlad midaysan ah oo wata nidaam federaal-uyaal ah, iyagoo ka digay in nidaamka federaalka uu kharash badan yahay oo uu kordhin karo iska horimaadka iyo kala qaybsanaanta ka jirta Soomaaliya.

Ka qaybgalayaashu waxay sheegeen in loo baahanyahay nidaam dowlad midaysan ah oo ay gobolladuna yeelanayaan madaxbannaani gaar ah, iyadoo dowladda dhexena gacanta ku hayso dhaqaalaha. Ka qaybgalayaashu waxya ku doodeen in isku ekaanshaha afka, dhaqanka iyo diinta Soomaaliya awgeed habka dowladda midaysan uu yahay kan ugu habboon. Dadka badankoodu waxay ku nuuxnuuxsadeen in loo baahanyahay in la garowsado dhibaatooyinka taariikhiga ah ee ka qaybqaatay awood ku dagaalanka maanta u dhexeeya madaxweynaha iyo ra'iisal wasaaraha oo taageero laga geysto sidii loo qeexi lahaa awoodaha uu mid kasta ku yeelanayo dowladda cusub.

Ka qaybgalayaashu waxay ku andacoodeen in loo baahanyahay inay Soomaalidu aragti midaysan ku wada noolaato xukun wadaag ah iyo dowlad qaran oo mar walba xurmaysa madaxbannaanida heerarka hoose ee dowladda oo soo faragelisa keliya markay jirto ku takrifal lagu sameeyo mabaadi'da dimuqraadiga iyo faafid musuqmaasuq. Waxaa muuqatay in loo baahan yahay in laga hadlo heerarka gacan ku haynyta kaabayaasha muhiimka ah, sida waxbarashada, caafimaadka, ciidanka, xanaanada xoolaha, iwm. Waxaa intaa dheer, waxaa loo baahan yahay in haween laga qaybgeliyo doodaha xukunka, gaar ahaan waxaa lagu nuuxnuuxsaday in ay haweenku ka qaybqaataan nadaamka aan diinta ku salaysnayn.

Doodihii furnaa waxaa lagu soo gabagabeeyay dooddii ku saabsanayd khiyaaraadka xukun ee u furan Soomaaliya. Waxaa la isla gartay inay tahay mas'uuliyadda ergooyinka inay ka doodaan hab dowladeedka ku habboon Soomaaliya.

Ka qaybgalayaasha ka socday gobolka Puntland ee Soomaaliya waxay dareemeen in dowladda TFG ayna kala tashan doodihii ku saabsanaa khiyaaraadka xukun si buuxdana ugama faa'iidaysan khayraadka ay hastaan. Waxay soo jeediyeen inay khibradahooda dadka la wadaagaan waxayna codsadeen in geeddisocodka nabadda si buuxda looga qaybgeliyo.

Dowladda Federaalka Ku Meel Gaarka waxay ballanqaadday in geeddi socodka nabadda iyo doodaha dastuurku ay ahaan doonaan kuwo laga wada qaybgalo oo dad yar oo ka socda hal gobol keliya aysan gacanta ku hayn doonin. Ka qaybgalayaashu waxay soo jeediyeen in loo baahanyahay in dastuur qorridda lala billaabo hawl dibuheshiisiin Soomaaliyeed oo ay la socdaan qorshe doodo dadka dhexdooda ka dhaca.

Doodihii furnaa waxay taageereen hab maamul baahsan oo leh dowlad dhexe oo habboon oo shaqaynaysa oo ku salaysan dhaqanka iyo caadooyinka Soomaalida, waxayna

sabab ahaan ugu soo qaateen isu ekaashaha dhaqan iyo diineed ee Soomaaliya ka jirta. Ka qaybgalayaashu waxay tilmaameen in loo baahanyahay in la sameeyo hab dowladeed oo lala xisaabtami karo, ha ahaado mid midaysan ama mid federaal ah, oo ah inuu ka fogaado ku takrifalka nidaamka.

## II. Dhab ahaanta ama xaqiiqada qabiilka: Saameynta uu ku leeyahay nidaamyada dowladda mustaqbalka

Fadhigan waxaa lagu soo bandhigay fasiraad Soomaaliyeed ee xaqiiqada ama dhab ahaan qabiilka iyo saameynta uu ku leeyahay wadahadallada nabadda Jabuuti, hawsha dastuur qoridda iyo nidaamka dowladeed ee habboon in la qaato. Ka qaybgalayaashu waxay ka doodeen xiriirka ka dhexeeya xaqiiqada qabiilka iyo federaalka, dowladda midaysan iyo hababka kale ee dowlad iyo sida ugu wanaagsan oo looga faa'idaysan karo dhismaha qabiilka si Soomaalida loogu sameeyo xasillooni dheeraad ah xag dhaqan iyo dhaqaaleba.

Muxaadaradii ugu horreysay ee muhimsanayd oo ku saabsanayd mawduuca xaqiiqada qabiilka iyo saamaynta uu ku leeyahay nidaamyada dowladda mustaqbalka waxaa soo jeediyay Prof. Cabdi M. Kusow, oo ah nin Soomaali ah oo arrinta ku xeeldheer. Wuxuu yiri dhibaatada ugu weyn ee qabiilku u leeyahay midnimada iyo hawsha nabadda Soomaaliya waxaa ka mid ah; in ay jiraan qaybo ka mid ah bulshada Soomaaliyeed oo bulsha ahaan loo sooco iyo kala fogaanta dhulka (tusaale ahaan, Soomaalida reer waqooyiga ayaa loo arkaa inay ka duwan yihiin walaalahooda reer koonfureedka ah), kala fogaan ku salaysan dhaqanka, habka waxsoosaarka, abtirsiinyada iyo afka, iyo sheekooyinka dhulka la xiriira, tusaale ahaan; U Dhashey iyo Ku Dashey. Wuxuu intaa raaciyay in dagaalka sokeeye uu ka dhigay sheekooyinka ama sheegashada dhulka mid ka xoog badan sheekooyinka kale. Sheekooyinka kale ee dhowaan so ifbaxay waxaa ka mid ah in qabiilna qabiil kale ka xoog badnayn. Soo jeediyaha muxaadarada wuxuu rumaysnaa in qabiilku uu yahay mid ka tarjumaya sinnaan la'aanta bulsho ee ka jirta Soomaaliya.

Md. Maxamed Cusmaan Jawari ayaa jeediyay muxaadarada labaad oo uu lahaa Md. Cabduraxmaan Cusmaan Cabdulle 'Shuke' mawduuceeduna ahaa 'xaaladda dhaqanka Soomaaliyeed, dhaqan-dhaqaale iyo ta haweenka ee ka jirta habdhismeedyada qabiilka'.

Wuxuu tilmaamay in dhaqan ahaan ay Soomaaliya lagu xukumay Islaamka iyo xeer dhaqameedka oo la xiriira nolosha reer guuraaga oo saameeyay nidaamka akhlaaqda iyo dhaqanka bulshada Soomaaliyeed. Nidaamkan wuxuu haweenka ka reebay dhammaan hawlaha go'aannada lagu gaaro. Haweenku waajib kama saarnayn arrimaha qabiilka, ha ahaato guurka laga guursado qabiil kale ama arrimo kale. Loo ma ogolayn inay ka qaybqaataan dagaalka ama ay xoolo yeeshaan, kaalintooduna waxay ku koobnayd inay guriga joogaan. Haseyeeshee, waqtigan dagaalka laga soo baxay kaalinta haweenku way isbeddelaysaa waxaana jira tusaalooyin badan ee ah nabad-dhisid iyo xaq u doodid oo ay haweenku hoggaamiyaan.

Muxaadarada waxaa lagu sheegay in Puntland tirada isimadu ay kortortay qarnigii la soo dhaafay oo ay meeshay ka ahayd 8 sannadkii 1920 ay gaartay 65 sannadkii 2005. Sababaha dheliyay in tirada isimadu ay kor ugu kacday waxaa ka mid ah xeerkii dhaqanka oo daciifay, qabiilka oo la siyaasadeeyay, tirada dadka oo korortay iyo guuridda, raadinta aqoonsi bulshadeed iyo ka qaybgal siyaasadeed, jiritaan la'aanta xukun sharci dagaalka sokeeye awgiis iyo sababo dhaqaale.

Muxaadaradu waxay soo bandhigday su'aasha ah in loo baahan yahay in dhismaha qabiilka lagu dari karo hawsha hoggaanka siyaasadeed iyo in kale iyo heerkee. Waxaa muuqatay in loo baahan yahay in qabiilka laga qabygeliyo hawlaha siyaasadda si loo yareeyo xasilloni la'aanta siyaasadeed.

Iyagoo ka jawaabaya muxaadaradihii mawduucan laga soo jeediyay, ka qaybgalayaashu waxay isla garteen in aan loo baahnayn in nidaam siyaasadeed ee shaqaynaya lagu saleeyo qabiil iyo in dadaal lagu bixiyo in la hormariyo ka qaybgalka muwaadiniinta. Dhanka Islaamka haddii laga eego, qabiil waxaa dadka loogu sameeyay in loogu fududeeyo xiriirka ka dhexeeya iyo in la xaqiijiyo xaqa dadku ay ku leeyihiin qabiilka dhexdiisa. Dowlad qabiil ku dhisan ma shaqayn karto. Sunnada Rasuulka (SAW) waxay diidaysaa qabiil ku shaqausiga. Bulshada Soomaaiyeed qabiilku waa xaqiiqa jirta oo aan la dafiri karin, laakiin waa in lagu xakamadeeyaa nidaamka dowladda iyo dastuurka.

Doodihii furnaa qof ka qaybgale ah ayaa sheegay in qabiilku uusan ahayn sababta keentay dhibaatooyinka Soomaaliya haysta waayo Soomaaliya waxay ahayd dalkii Afrika ugu horreeyay ee ay ka dhacday xilwareejin nadab ku dhacday ee madaxtooyo billowgii sanadihii 1960-yedii.

Dooduhuna waxay tilmaameen in loo baahan yahay in maskaxda lagu hayo sidii nidaamka dowladdu uu haweenka metelaad u siin lahaa, sidii wax looga qaban

lahaa takoorka loo geysto haweenka iyo dadka laga tira badan yahay iyo sida fursado siman loogu siin lahaa go'aan qaadashada iyo sida loo xaqiijin lahaa in waxyaabaha ka dhalanaya sinnaanta ragga iyo haweenka ay u muuqdaan.

Ka qaybgalayaashu waxay si wadajir ah u taageereen baahida loo qabo in la horumariyo muwaadinnimo siman oo lala dagaallamo caadooyinka iyo fahamka dib u dhaca keenaya oo ah in qabiil kasta inuu midka kale ka sarreeyo. Siyaabaha sidaa lagu gaarana waxaa ka mid ah in la sameeyo xisbiyo siyaasadeed ee qaran oo aan ahayn kuwa qabiilka ku saleysan.

## III. Federaalka Maaliga: Khiyaaraadka furan iyo waxyaabaha ka dhalan kara

Fadhigan wuxuu dulmar guud ah ku sameeyay arrimaha iyo ilaha maaliga oo dowlad qaran ee gobollo madaxbannaan lihi ay ku qasbantahay inay u fiirsato. Ergooyinku waxay sidoo kale ka fikireen nooca xudduudaha sharci, hay'adaha qaran iyo kuwa gobolleed ee loo yaahanyahay in la sameeyo si ay u maamulaan federaalka maaliga.
Muxaadarooyinku waxay soo jeediyeen habab kala duwan oo loo dhisi karo federaalka maaliga, oo ay ka mid ahaayeen jiritaanka laba heer xukuumad ama ka badan, unugyo juqraafi ah, sameeynta hay'ado xukuumadeed, qaybsashada xilalka, awoodaha xukunka iyo awood in loo lahaado in si qotoman loola dhaqmo heerarka xukuumadaha dhexdooda.

Dr. Mutakha Kangu, oo ah xeeldheere caalami ah iyo Md. Frederick Kilby oo ka tirsan Bangiga Adduunka ayaa soo jeediyay warqado ku saabsan mawduuca laga doodayay. Dr. Kangu wuxuu muxaadaradiisa ku soo jeediyay in dowladdu lahaato aragti lagu hormariyo in khayraadka Soomaliya si simman lagu qaybsado, wax laga qabto lana taageero danaha kooxaha taagta daran. Wuxuu intaa ku daray in loo baahanyahay in la ururiyo kharash iyo canshuuro ku filan si ay muwaadiniintu u wada gaaraan nolol siman. Haddaba, sinnaan maaliyadeed waxaa lagu gaari karaa nidaam canshuureed oo u dhigma kartida ilaha gobollada.

Xeeldheeruhu wuxuu ku nuuxnuuxsaday in loo baahanyahay in la xoojiyo afar dhinac ee awoodda maaliga: 1. awood canshuur lagu soo rogo oo kharash lagu ururiyo, 2. awood kharashka lagu maamulo, 3. awood kharashka lagu bixiyo iyo 4. awood lagu xakameeyo laguna xisaabo. Arrimahan waxay isu beddeli karaan siyaabo kala duwan. Waxaa dhici karta in heerka qaran uu ururiyo canshuuraha ugu badan, heerka hoosena ururiyo canshuuraha ugu yar. Waxaa aad u muhimsan in la hubsado in gobolladu ay leeyihiin karti dadeed oo ay canshuur ku ururiyaan. Sidaa darteed, waxaa dhici karta in heerka qaran la siiyo awood lagu ururiyo laguna maamulo canshuuraha isagoo ka wakiil ah heerarka hoose. Nasiibdarro, tani waxay gaarsiin kartaa awood meel dhexe isugu tagta oo aan ahayn mid baahsan. Khiyaar kaloo la soo jeediyay wuxuu ahaa in kharash bixinta si caqligal ah loo qaybsado oo lacagaha si wareeg ah loogu qaybiyo gobollada iyadoo la eegayo sinnaanta maaliyadeed.

Warqaddii uu jeediyay Md. Frederick Kilby waxay ku saabsanayd canshuur ururinta iyo xiriirka ay la leedahay hodonnimada. Wuxuu ergooyinka u soo jeediyay inay u fiirsadaan hab deeq oo isku duuban oo xaddidaya inta ay la egtahay lacagta heer goboleed lagu qaybsan karo. Tani waxay keenaysaa dood ballaaran iyo furfurnaan ama hufnaan. Miisaaniyadaha dowladdu waxay xaddidaa lacagta lagu bixiyo miisaaniyadaha waaxaha. Tan faa'iidadeedu waxaa weeye inay u ogolaanayso gobollada inay isweydaarsi go'aan ku gaaraan. Waxaase dhici karta in nidaam ku wareejin ah uu keeno dibuheshiisiin weyn. Tusaale ahaan, maamulka Somaliland wuxuu horeba ugu dhaqmaa miisaaniyaddisa u gaarka ah oo kooban si uu nabadda u sugo oo u haysto shaqaale. Waxaa loo baahnaan karaa dabacsanaan badan ilaa iyo inta laga gaarayo nidaam xoog leh.

Waxaa kaloo la ogaaday in amaahda gudaha ay aad ugu yartahay Soomaaliya, taasoo gaarsiinaysa in lacagta la soo daabaco ilaa iyo inta nidaamkii bangiga dhexe laga habaynayo. Mustaqbalka waa in loo fiirsadaa mabaadi'da hagta amaahashada gobollada, si la isaga ilaaliyo khatarta ku jirta kharashka deengudidda. Sidoo kale horumarinta tayada iyo warbixinta maaliyadeed waa in lagu dadaalaa.

Wuxuu sheegay si federaalka maaliga u shaqeeyo, waa in mas'uulidda iyo islaxisaabtanka la fuliyaa. Weliba, waa in la sameeyaa siyaasad istiraatiji ah ee heer magaalo ah oo madaxbannaani sharci leh. Xaqa ay gobolladu u leeyihiin inay canshuur qaadaan iyo in la iska ilaaliyo xiriir aan sinnayn ee gobollada ka dhexeeya waxay ka mid yihiin shuruudaha laga maarmaanka u ah federaalka maaliga inuu guuleysto.

Doodihii furnaa, waxaa gabagabadii la isla gartay in canshuur ururintu ay noqoto nidaam dhan walba eega oo isku dheellitirnaan qotoma ku leh heerka federaalka. Xukunka sharciga iyo dib u soo celinta nabadda waa in la hormariyaa marka laga doodayo dastuurka si canshuuraha iyo kharash ururintu aan loogu takrifalin ama loo musuqmaasuqin.

Canshuurta ganacsiga caalamiga ayaa loo arkay inay tahay isha ugu weyn ee kharash laga helo. Sidaa darted, dib u habayntu waa inay u fiirsataa inta ay dowladda dhexe qaybiso iyo intay ka hesho ganacsiga. Khiyaar la qaadan karo waxaa weeye in la fiiriyo hadba siday gobolladu sabool u yihiin. Khiyaar kale waa hab shardi ku xiran oo ay isafgarad ku gaaraan heerarka dowladda dhexe iyo gobollada. Waxaa laga yaabaa in xiriirkan uu yahay mid hadda uun soo ifbaxaya oo aan weli wax ku ool noqonin.
Waxaa la soo jeediyay inay dhici karto in Somaliland iyo Puntland ay ku soo biiraan nidaam federaal ah sidii ka dhacday Koonfur Afrika ka dib markii la baabi'iyay nidaamkii midabtakoorkii oo keenay in gobolladu ay midoobeen. Waxaa lagu heshiiyay in bangiyada dhexe ee gobollada iyo ciidanka lagu wareejiyo dowladda dhexe.

Waxaa si adag looga soo horjeystay habka xisaabeed ee saldhig u ah nidaamka qabiilka ku salaysan ee 4.5, maxaa yeelay ma cadda sida ay qabiilladu xaddidaan tirada dadkooda. Nidaamkan 4.5 wuxuu u egyahay nidaamkii midab takoorka, maxaa yeelay qabiillada 0.5 ayaa ah kuwa ugu wax soo saar badan oo ummadda quudiya. Nidaamka lagama hirgelin karo Soomaaliya, markaa waxaa loo baahan yahay in la sameeyo nidaam kale oo lagu qaybsado faa'iidooyinka dhaqaalaha.

## IV. Sameynta Guddiyada ku xusan CahdigaFederaalka Ku Meel Gaarka: Caalamadaynta Xudduudda Gobollada, Doorashada, iyo Tirakoobka

Fadhigan waxaa lagu gorfeeyay sameynta guddiyada gacanta ku qabanaya xudduudaha gobollada, doorashada iyo tirakoobka iyo ururinta macluumaadka.

Md. Ray Kennedy oo halkan ka soo jeediyay muxaadaradii ugu weynayd, ayaa tilmaamay Hay'adaha Doorashooyinka Maamula (EMB) guud ahaan waxay u kala baxaan laba nooc: nooc madaxbannaan iyo mid ay dowladdu leedahay. Midkan dambe wuxuu ahaan karaa hay'ad garsoor ama hay'ad fulin/maamul, laaakiin waxaa dhici karta in midka dambe uu yahay khiyaarka keliya ee u furan Soomaaliya, waayo waa xil ka jira dalka oo dhan. Dhanka maamulka waxaa geli dowladda oo qaadan karta kaalin kormeer oo leh hab maamul madaxbannaan oo joogta ah (waaya arag wanaag) ama mid ku meel gaar ah (waqti gaaban oo kharash yar, waqti dheer oo kharash badan) ama nidaam isku dhafan. Mas'uuliyaadka guddiga waxaa ka mid ah inuu dejiyo xudduudda sharciga iyo siyaasadda. Kormeerku waa inuu noqdaa mid guud iyo mid gaar ahba, tusaale, maaliyadda iyo warbaahinta. Habka muranka lagu xalliyo waa in xisaabta lagu daaa. Marka la sameeynayo Xulashada/magacaabidda xubnaha guddiga waa in loo fiirsadaa ka qaybqaadashada laamaha fulinta, sharcidejinta, garsoorka, axsaabta iyo ururrada bulshada. Shuruudaha xubinnimadu waa: da'da, muwaadinnimada, inuuusan sarkaal xisbi ka tirsan ahayn, inuusan doorasho u taagnayn, inuusan qaraaba dhow la ahayn qof u taagan doorasho, inuu iskudheellitiri karo fiirada gaarka ah ee qolooyinka iyo gobollada oo ay ka midyihiin haweenka iyo dadka aan laxaadka lahayn. Tirada xubnihiisa: inta u dhexeeysa 3-13, hadba sida ay ujeeddadu tahay. Waxaa si aad ah loogu talinayaa in hay'ada maamulka doorasha (EMB) ee ugu horreysa la sameeyo doorashada ka hor. Hay'adda maamulka doorashadu (EMB) waa in la siiyaa mudnaanta koowaad intaan xeerba la soo saarin. Maxay hay'adda maamulka doorashada (EMB) muhim u tahay? Ku kalsoonaan, xaqnimo/sharciyad iyo ogoolaasha doorasho waxay si dhab ah uga tarjumi doonaan rabitaanka dadka Soomaaliyeed. Markaa aad bay u fiicantahay in dadaal lagu bixiyo si arrintan loo sixi lahaa.

Jawaabihii muxaadarada laga bixiyay waxay tilmaameen in loo baahanyahay in Dowladda Federaalka Ku Meel Gaarka ay si degdeg ah u sameeyso guddiyada xudduudaha, doorashada iyo tirakoobka. Waxaa lagu taliyay in la kala saaro xilalka siyaasiga iyo kuwa farsamada. Weliba, waxaa la soo jeediyay in la billaabo diyaarinta hal hay'ad, oo uu baarlamaanku xeer ku dejiyo xudduudaha sharci ka hor intaan la soo jeedinin arrimaha siyaasadda. Tanna waa in la raaciyaa in laga shaqeeyo habdhismeedka maamul, xukun, farsamo iyo fulin. Marxaladdan billowga ah waxay qaadan doontaa hal sanno in la billaabo.

Ka qaybgalayaashu waxay ku nuuxnuuxsadeen in horumarinta hay'adahan ay u baahantahay maamul wanaag iyo shaqaale karti leh. Sidoo kale waxaa la adkeeyay in loo baahanyahay in metelaaddu ay caddaalad ku dhisnaato, qurbajoogta ay ka qaybqaadato iyo hawsha waqtigii loogu talagalay lagu fuliyo.

Ka qaybgalayaashu waxay tibaaxeen in loo baahanyahay in la horumariyo tusaale ka tarjuma bulshada Soomaaliyeed. Waxay soo qaateen Guddiga Dastuurka Federaalka ee Madaxbannaan iyo Guddiga Adeegga Madaniga (shaqaalaha) oo ah tusaale jira oo shaqeynaya.waxay kaloo ku nuuxnuuxsadeen in loo baahanyahay in la sameeyo Guddiga Dibuheshiisiinta oo hoggaamiya nabadda.

Waxaa kaloo la tilmaamay in loo baahanyahay in kalsooni la yeesho. Waxaa la soo jeediyay in lala shaqeeyo warbaahinta si kalsoonida sare loogu qaado.

Su'aasha ah in xubnuhu dadka metelaan sida baarlamaanka oo kale waxay keenaysaa in la xaddido tirada xubnaha. Metelaadda ka sokow, aqoon iyo karti waa in laga fikiraa. Ka qaybgalayaashu waxay isla garteen in doodaha siyaasadda la geeyaa heer dadweyne oo bulshada caalamkuna taageero farsamo u fidiso Soomaalida, balse waa inaysan arrinta keligeed gacanta ku dhigin.

Arrinta ku saabsan xubinnimada guddiyada, ka qaybgalayaashu waxay ku taliyeen dadka doonaya inay guddiyada ku soo biiraan waa inuu waajib soo jiito oo uusan soo raacin mushaaro waaweyn. Waxaa intaa dheer, tirada xubnaha iyo habka lagu soo xulo, waa innusan go'aaminin hal wasiir keligiis, balse ay u dhan yihiin golaha wasiirradu, xeerna lagu saaro.

Waa in la qaataa talooin ay ka mid yihiin in ay xubnuhu karti iyo aqoon leeyihiin oo aan horey denbi loogu helin. Dooddii ku saabsanayd sameynta guddiyada waxaa bartilmaameed looga dhigay seddax guddi ee cusub oo ah: Guddiyada xudduudaha, doorashada iyo tirakoobka, arrimaha dooddana waxaa ka mid ah:

- ✓ Guddiyada waa inay Soomaali lahaataa, xubnahana waa inay Soomaali ahaadaan
- ✓ Waa in la ogaadaa ciddii hawsha sii wadi lahayd kadib marka ay wadaagayaasha shisheeye ay tagaan.
- ✓ Guddi kasta wuxuu xiriir la leeyahay mid ka mid ah wasaaradah Dowladda Federaalka Ku Meel Gaarka (TFG) ee hadda jira, sida Wassaradda Horumarinta Gobollada, Arrimaha Federaalka iyo Dastuurka (oo xiriir la leh Guddiga Dastuurka IFCC). Wasaaradda ay arrintu khuseeyso waa inay dejisaa xudduudaha sharci iyo xeer hoosaadyada (sharcigal, maamulka, iwm) ee guddiga oo ay maamushaa arrimaha guddigaas khuseeya.
- ✓ Guddiyada kale waxay qayb ka ahaanayaan hawsha dastuurka lagu ogolaanayo oo ay ka mid tahay aftida dastuurka ee ugu dambeysa. Midda ugu dambeysa waxay u baahantahay in baarlamaanku uu dejiyo xeer doorasho.

Doodihii furnaa waxaa lagu soo jeediyay fiirooyin iyo talooyin. Waxaa la arkay in Puntland iyo Somaliland ay wadaan doorashooyin billowga sannadka 2009, in kastoo laga cabsanayo in dib u dhac uu ku yimaado.

Ka qaybgale ayaa sheegay inay guuldarreysatay iskuday ay Talyaanigu ku doonayeen inay xudduudaha qeexaan sannadkii 1950 isagoo la kaashanaya Qaramada Midoobay, haddana Soomaaliya waxay billowday arrintan iyada oo 9 billood keliya ay ka hartay muddada Dowlada Ku Meel Gaarka.

Waxaa lagu taliyay in loo baahanyahay in sare loo qaado isgaarsiinta si loo kordhiyo kalsoonida hawsha waayo waxaa badan cabashada dadka in laga tagay. Waxaa intaa dheer, dhammaan dhibaatooyinka hoggaanka waa in gudaha lagu xalliyaa iyadoon dibadda laga soo faragelin. Waxaa loo baahan yahay in Dowladda Ku Meel Gaarka ay wax ka qabato ku tumashada xuquuqda aadanaha ee ka dhaca dowladda ama dad kaleba. Waa in wax laga qabtaa gumaadka, sida wixii ka dhacay Somaliland sannadihii 1980kii iyo denbiyada ka dhanka ah aadanaha. Waxaa lagu taliyay in guddiyadu arrintan wax ka qabtaan. Waxaa la soo jeediyay in la raadiyo xuluul sahlan oo sahlaya in dhibaatooyin si fudud looga baxo, tusaale ahaan in la sameeyo xoogag shaqo intii guddiyo la sameyn lahaa.

Waxaa lagu taliyay in marka guddiyadana la sameynayo in loo baahan yahay in la kala saaro dhinacyada siyaasadda iyo kuwa maamulka. Sidaa awgeed, guddiyada waa inay hoggaamiyaan oo ay maamulaan dad waxgarad ah oo farsamayaqaana ah.

Ergooyinku waxay tibaaxeen in loo baahan yahay hab sharci iyo siyaasad ee degan oo shardi u ah qabashada doorashooyinka. Waxaa loo baahan yahay ugu yaraan hal sano si loogu diyaargaroobo in doorashooyinka la qabto, tusaale ahaan diiwaangelinta codbixiyeyaashu waa hawl ballaaran oo u baahan qorsheyn faahfaahsan oo laga fiirsaday. Guddiga Doorashada (EC) wuxuu u baahan yahay inuu dhiso tayadiisa si uu u qabanqaabiyo doorasho lagu kalsoonaan karo. Sidaa awgeed, sameynta Guddiga Doorashada waan in mudnaanta kowaad la siiyaa.

Waxaa loo baahan yahay in la garowsado in Somaliland iyo Puntland labaduba ay sameeyeen iskuday dimuqraadiyayn ah oo heerar kala duwan leh, Dowladda Ku Meel Gaarkana maamulladan waxbay ka baran kartaa marka la eego qoridda dastuurka mustaqbalka. Waxaa laga welwelsanaa muddo intee la eg bay Soomaaliya ku soo saari kartaa dastuur gudaha lagu sameeyay. Dastuurkii 1960 waxaa soo saaray maamulkii isticmaarka, maantana Soomaaliya kalsoon daro ayaa dadka dhexdooda ka jirta taas oo aan waagaas jirin.

Guddiga Xudduudaha oo xaddidaya xudduudaha u dhexeeya tuulooyinka, degmooyinka, gobollada iyo dowlad-goboleedyada waxaa loo sameyn doonaa iyadoo la aqoonsanyahay in arrintan ay tahay hawl adag.

Dastuurku aad buu uga muhimsanyahay sida la aqoonsanyahay, waayo waa ballanqaad muddo dheer. Qaybta waxbarashada madanigana aad bay muhim u tahay. Hawsha dastuur sameynta waa in si foojigan loo hanto, maxaa yeelay waa mustaqbalka Soomaaliya.




## V. Hay'adaha fulinta, sharcidejinta, garsoorka, federaalka, midaysan iyo kuwa maamul baahsan

Fadhigan waxaa lagu soo bandhigay dulmar guud ee seddaxda heer ee dowladda iyo habdhismeedka awoodda ee nidaam federaal ah, mid midaysan iyo kuwo kaleba.

Dr. Markus Böckenförde oo ka tirsan Machadka Max Planck iyo Injineer Muusse Cabdullaahi, oo ah xeeldheere Soomaali ah ayaa mawduuca ka hadlay.

Dr. Markus Böckenförde wuxuu qeexay in seddaxda laamood ee nidaam dowladeeed kasta oo la qaataba waxay kala yihiin, laanta sharcidejinta oo u xilsaaran dejinta sharciyada iyo xeerarka, laanta fulinta oo u xilsaaran inay fuliso sharciyada iyo laanta garsoorka oo u xilsaaran inay hirgeliso oo fasirto sharciyada.

Wuxuu soo jeediyay in kala saaridda awoodahu ay tahay habka ugu wanaagsan ee lagu xakamayn karo ku takrifalka awoodda. Hanaanka federaalka, kala saaridda waxaa laga sameeyaa heerka federaalka iyo heerarka dowlad goboleedyada.

Wuxuu soo jeediyay laba khiyaar ee nidaamyada maxkamadaha:

Kiyaarka kowaad: Maraykanka – Kan wuxuu leeyahay tusaale kala soocid iyo nidaam laba maxkamad leh

i. (Federaalka) Sharciga qaran waxaa hirgeliya maxkamad ka hawlgasha heer qaran keliya
ii. Dowlad goboleed walba waxay leedahay nooc labaad ee maxkamado ah ee hirgeliya sharciyada dowlad goboleedka keliya

Khiyaarka labaad: Jarmalka – oo leh tusaale isku dhafan iyo hal nidaam maxkamadeed.

i. Maxkamadaha dowlad goboleedka iyana waxaa loo baahanyahay in ay hirgeliyaan ama wax ku xukumaan sharciga federaalka
ii. Dacwad kasta waxay ku billaabataa maxkamad dowlad goboleed laakiin waxaa rafcaan looga qaadan karaa heerka federaalka.

Isagoo ka hadlaya mawduuca baahinta maamulka, Inj. Muusse wuxuu sheegay inay jiraan seddax nooc oo looga baarandegi karo Soomaaliya oo kala ah: 1. baahin siyaasadeed oo ah wareejinta awoodda ama mas'uuliyad siyaasadeed, 2. baahin maaliyadeed, oo ah wareejinta mas'uuliyadda ee ilaha dhaqaalaha, 3. baahin maamul oo ah wareejinta qorsheynta iyo maalgelinta. Wuxuu intaa raaciyay in tusaalooyinka baahinta ay fursado wanaagsan siinayaan hawsha ka wada qaybgalidda. Muxaadaradiisa waxay tilmaantay in shuruudda laga rabo baahinta guulaysata ay ka mid yihiin rabitaan siyaasadeed, xudduud sharci ee xoog leh, koox awood leh oo dowladda ka tirsan oo taageerta baahinta iyo jiritaan waxgarad xoog leh oo gudaha jooga oo meelahooda mas'uuliyadda ka qabta. Waxaa dowladda dhexe looga baahanyahay in ay hagto oo ay taageerto baahin guuleysata. Mabda'a guud ee haga waa kala dambayn. Istiraatijiyada baahintu waa in wax laga qabto ika horimaadka, lana dejiyo hab ku habboon iyo in la xoojiyo tayada hab dhismeedyada baahinta.

Faa'iidooyinka ay leedahay baahinta waxaa ka mid ah; sare u qaadidda shaqada xukuumadda, dadka oo hela metelaad fiican, sare u qaadidda adeegga guud iyo xoojinta is dhexgalka qaran. dhibaatooyinka waxaa ka mid ah; sameynta heer dowladeed oo kale wuxuu xukuumadda ka dhigi karaa mid aan waxtar lahayn, wuxuuna kordhin kartaa kharashka dowladda.

Jawaabihii muxaadaradaha laga bixiyay waxaa ka mid ahaa in loo baahanyahay in la doorto nidaam munaasib u ah xaaladda Soomaaliya. Waxaa muuqata in habka baahinta xukuumaddu inuu yahay khiyaarka ugu wanaagsan, waayo wuxuu dalka ka badbaadinayaa kala daadasho wuxuuna dadka siinayaa xiriir dhow ay la yeeshaan dowladda. Waxaa loo baahanyahay nidaam cad oo ku saleysan awood siyaasadeed ee meel dhexe ku urursan iyo maamul federaal ah. Waxaa loo baahnaan doonaa hoggaan xoog leh oo fuliya nidaamka la doortay – guuldaraysi la'aan. Waxaa lagama maarmaan ah in waqti badan arrinta laga doodo si loo abuuro wacyi ku wajahan saameynta uu qabiilku ku leeyahay Soomaaliya. Ka qaybgale ayaa soo jeediyay in Cahdiga Federaalka Ku Meel Gaarku uusan dastuur ahayn. Wuxuu u baahanyahay in la beddelo ama

la habeeyo, maxaa yeelay wuxuu dhowaan noqon doonaa mid aan waxba ka jirin heshiiska nabadda Jabuuti daraadiis. Dastuurku waa inuu ahaadaa mid loo wada siman yahay oo aysan qorin hal koox keliya. Soomaaliya waa inay billowdaa dastuur qaran laakiin ay waqti dambe dasaatiir u diyaarisaa dowlad goboleedyada hadday jiraan arrimo gaar ah oo ay u baahanyihiin/doonayaan in wax laga qabto.

Waxaa kaloo la sheegay in laba nidaam ee maxkamado ah ay kharash badnaan karaan oo ay u baahnaan karaan shaqaale badan. Hindiya Maxkamadda Sare waa maxkamad federaal ah oo fariisata gobol kasta, maxkamadaha hoosena waa maxkamado goboleed. Sharciga ciqaabta dalkaasi ka jira waa mid qaran.

Doodihii furnaa waxay tilmaameen in loo baahanyahay in awoodaha la kala saaro iyadoo laga ambaqaadayo dhaqanka Soomaaliyeed – tusaalooyinka waa in lagu saleeyaa xaalado la mid ah ta Soomaaliya, ee ma aha Kanada ama Ingiriiska. Waxaa loo baahanyahay in isbarbardhig laga sameeyo nidaam midaysan, mid federaal ah si loo muujiyo dheefaha iyo iinooyinka ay Soomaalida u leeyihiin.

Ka qaybgale ayaa sheegay in Soomaalidu siyaasadda u taqaan cayaar wasakh ah ee isdhagrid ah, dowladduna wax aan la taageerin oo aan lagu kalsoonayn iyo hoggaankana wax dadka cadaadiya. Haddaba si looga foogaado ceebahan la aaminsanyahay, Soomaalidu waxay u baahanyihiin dastuur si buuxda loo fulin karo. Sidoo kale waa inuu xambaarsanaadaa aragtida dadka oo ay Soomaali qortaa.

Hoggaanku wuxuu ahaan doonaa arrin aad u muhimsan ee waa inay dadka metelaan oo ay dhegeystaan codkooda. Kadib geeddisocodka nabadda Jabuuti waxaa loo baahnaan doonaa waxbarasho madani ah si dadka loogu baro isbeddelka bulshada ku yimaada, kaalintooda iyo mas'uuliyaadkooda.

Waxaa loo baahanyahay in la ogaado waxay Soomaalidu doonayso lana dhegeysto waxay dadku yiraahdaan isla markaana la tixgeliyaa khiyaaraadkii laga bartay waaya araggii hore.

## VI. Nidaamyada habboon ee dowladda: iyo mid walba saameeynta uu Soomaaliya ku leeyahay

Fadhigan waxaa lagu soo bandhigay doodo iyo muxaadarooyin aad u bartilmaameedsan ee ku saabsan xaaladda siyaasadeed, dhaqaale, sharci iyo bulsho ee gobollada ismaamul hoosaad leh. Waxaa intaa dheeraa, waxaa la soo jeediyay ammaanta iyo dhaliisha nidaam federaal ah ee gobollo maamul baahsan, ama ismaamul hoose leh iyo habab kale ee dowladeed.

Muxaadarooyinka iyo doodaha waxaa loola dan lahaa in diiradda lagu saaro in la soo koobo khiyaaraadka ku saabsan hanaanka federaalka iyo baahinta maamulka ee Soomaaliya.

Warqad uu qoray Prof. Ehtisham Ahmed ayaa waxaa fadhiga ka soo jeedisay Dr. Hodan S. Ciise, oo ah khabiirad Soomaaliyeed oo arrinta ku xeeldheer.

Waxay ku nuuxnuuxsatay in xukunka sharciga iyo nabadda, oo shardi u ah nidaamka federaalka loo baahanyahay si fiican loo sugo. Nabadgelyo, xukun sharci, hufnaan ama furfurnaan iyo xil-iska-saarka hantida ama danaha guud ee la wada leeyahay waa waajibaadka dowladda. Waa in loo fiirsadaa dhammaan danaha dowladda, sida isticmaalka, maalgelinta iyo kharashka. Waa in la darsaa siyaasad maaliyadeed oo hagaysa wareejinta, bixinta lacagta iyo dakhliga canshuurta.

Nidaam federaal ah Soomaaliya wuu ka shaqeyn karaa. Dowladdu waxay mas'uul ka ahaan kartaa wareejinta lacag bixinta ee adeegyada daryeelka, sida nidaamka taageera dadka shaqa la'aanta ah, oo lagu fulinayo nidaam maamul baahsan.

Siyaasadaha maaliga waa inay kordhiyaan kobcidda dhaqaalaha oo sare u qaadaan heerka nolosha dadka. Waa in laga baarandego sababaha ka dambeeya dagaallada qabiillada sida shaqa la'aanta dhallinyarada. Sidoo kale sicirbararka waa in la xakameeyaa si loo xasiliyo sicirka raashiinka iyo waxyaabaha kale.

Waxaa la tibaaxay inay lagama maarmaan tahay in Bangiga Dhexe uu ka madaxbannaanaado dowladda iyadoo ay jirto isku dheellitirnaan. Waa inay jirto siyaasad lacageed oo leh xafiisyo qorsheyn iyo miisaaniyad ee xakameeya socodka lacagta. Dhinacyo ka mid ah nidaamka kaydka federaalka ee Maraykanka waa in loo fiirsadaa. Waxaa dhici karta Soomaaliya inay yeelato guddi ka kooban afar xubnood.

Jawaabihii la bixiyay waxay mar kale sheegeen in loo baahanyahay inay Soomaalidu wax ka bartaan waddamada ay ku noolyihiin ee qurbaha. Jiilka dhallinyarada ah waa in la siiyaa fursad ay hoggaanka ku qabtaan, iyadoo talo ka qaadanaya jiilkii hore ama odayaasha.

Doodihii furnaa waxay ku billowdeen laba su'aalood oo

asaasi ah oo ku saabsan nidaamka federaalka, waxayna ahaayeen: nidaamka federaalku Soomaaliya ma lagu hirgelin karaa iyo Soomaalidu ma isku afgaran kartaa hal nidaam?. Dadka qurba joogta ah waxay dareemeen habka 4.5 waxay dan ugu jirtaa hoggaamiyeyaasha ee dan uguma jirto dadweynaha.

Waxaa faallo laga bixiyay in nidaamka federaalka uu dabacsanyahay iyo in kale. Waxaa jirta xaalado dowlad goboleedyada khiyaar u siinaya inay madaxbannaani qaataa. Taasina waxaa cadaadis ku saari kartaa dowladda heerka qaran inay wax u qabato dowlad goboleedyada si ayna u dooranin inay go'aan.

Waxaa ka mid ah khiyaaraadka la qaadan karo awood furfurid, oo simman ama aan sinnayn. Dhibaatadu ma aha nidaam midaysan, dhibaatada Soomaaliya ka jirtay waxay ahayd maamul xumo iyo ku tumashada xuquuqda aadanaha. Nidaamka federaalka ama kuwo kaleba waa la eegi karaa oo la qaadan karaa si wax looga qabto xuquuqda aadanaha iyadoo dastuurka la raacayo.

Waxaa la soo bandhigay fikrado kala duwan oo ku wajahan habka dowladnimo ee ku habboon Soomaaliya. Iyagoo eegaya taariikh isticmaar ee Soomaaliya, ergooyinka qaarkood waxay dareemeen in loo baahanyahay in la tuuro siyaasadda qabiilka ku salaysan, la diido gobolaysiga waqooyi iyo koonfur oo laga baaraandego habka dowladeed ee guud ahaan ugu wanaagsan Soomaaliya. Qaar kalena waxay dareemeen in waqooyi uu yahay xaqiiqo jirta oo qasab ah in si furan looga doodo iyadoo lala kaashanayo qareenada Soomaaliyeed ee shirka jooga. Kuwo kalena waxay dareemeen in bulshada caalamigu ay wax isdabamarisay Soomaaliya oo ay ku qaldantay. Tusaale ahaan, kaalmada baniaadanimo ee loo fidiyo dadka Soomaaliya ku barakacay waa in laga hormariyaa doodaha ku saabsan nidaamka dowladda.

Waxaa la soo jeediyay in afti loo qaado mawduuca habka dowladeed uu ugu habboon Soomaaliya laba sanno gudahood. Xildhibaan ka tirsan Dowladda Ku Meel Gaarka, TFG, ayaa sheegay in sababta ay u burburtay dowladdii dhexe ee Soomaaliya ay ahayd musuqmaasuq awgiis. Maamul baahintu waxay awood siinaysaa gobollada, iyadoo dowladda dhexena ay xukunto dalka. Waxaa loo baahanyahay in waxgaradka Soomaaliyeed ee shirka jooga ay la yimaadaan xal beddela. Waxaa lagu dooday in dagaalka Soomaaliya ka jira uusan u dhexeynin Soomaalida, balse uu ka dhexeeyo dad ah xul siyaasadeed oo nidaamka qabiilka is xun u adeegsada. Dooddan waa inay Soomaalida sare uga qaadda meesha ay hadda joogaan. Waxaa jirtay dareen ah in waxgaradkii Soomaaliya ka tagay 20 sanno ka hor inayna xallin karin dhibaatooyin dalka haysta, balse waxgaradka Soomaaliyeed iyo odayaasha ee weli dalka ku nool ay wax ka qaban karaan, maxaa yeelay khibrad bay u leeyihiin isbeddelka dalka ka dhacay. Haseyeeshee, dadka qurba joogta ahina waxay dareemeen inay talooyin ka dhiiban karaan, maxaa yeelay qiimaha bulshada Soomaaliyeed wuxuu ku jiraa wadatashi.

Waxaa loo bahanyahay in caqli ahaan looga fikiro in la qaato khiyaaraadka federaalka oo aan jeceyl ama nacayb aan laga eegin oo aan muran siyaasadeed aan la gelin, maxaa yeelay dooduhu waxay weli marayaan heer farsamo.

Waxaa laga yaabaa in caalamadaynta xudduudaha ay keento dhibaato haddii baahida asaasiga ee dadka aan la daboolin. Tusaale, dhaqanka Soomaaliyeed dhulka daaqa xudduudo ma kala laha. Markaa, reer guuraagu ma dhowri doonaan xudduudaha.

Fikrad adag ayaa la soo bandhigay oo qabta in nidaamka federaalka uusan u fiicnayn Soomaaliya oo ku fiicanyahay dalalka ay ku wada noolyihiin kooxo kala isir ah. Dowlad midaysan ayaa loo qaybin karaa toddoba gobol oo aan qabiil ku salaysnayn. Waxaa loo baahanyahay in la aqoonsado sifooyinka ka wada dhexeeya Soomaaliya iyo kuwa u gaarka ah. Ka qaybgalayaasha badidooda waxay jecleysteen in Ra'iisal wasaaraha uu doonayo taladooda waxayna ku faraxsanaayeen inay ka qaybqaataan doodahan asaasiga ah oo ku saabsan nidaamka dowladda Soomaaliya.

"Muxaadarooyinku aad bay u wanaagsanaayeen waxayna waxtar u yihiin mustaqbalka Soomaaliya. Kulan hawleedku wuxuu yimid waqti ku habboon. Kooxihii heshiiyay (TFG iyo ARS) ayaa halkan wada jooga si ay u dhegeystaan talooyinka Soomaalida iyo xeeldheereyaasha caalamiga.

Socdaalkiina dheeraa ee aad halkan ku timaadeen waa mid wax soo saar badan leh. Waxaan idinka codsanayaa inaad sameysaan oo aad sare u qaadaan xiriirka ka dhexeeya Soomaalida dibada joogta iyo kuwa dalka gudihiisa jooga annagoo ku dadaalayna inaan dhibaatooyinka xallinno. Gudaha Soomaaliya waxaa jiira buuq badan ee waxaan u baahannahay dadka dibadda ka yimaada oo nagala taliya xaaladda Soomaaliya. Heshiiskan hadda

dhexmaray TFG iyo ARS awgiis, waxaa jiri doona fursado lagu taageero Soomaaliya. Waxaa jira caqabado fara badan oo naga wada hor imanaya annagoo dib udhisayna dalkeena. Waxaan u baahanahay inaan dib u soo nooleyno sharaftii dalkeena. Runtii aad baan ugu farxay doodihiina iyo talooyinkiina – waxaan rajaynayaa inaan mar kale dhowaan kulmi doono. Aad baad u mahadsantihiin".

**Mud. Ra'iisal assare Nuur Xasan Xuseen**

# Natiijooyinka Iyo Saameyna

Waxaa la isla gartay in shirka lagu dhisay horumarkii laga gaaray heshiiska Jabuuti wuxuuna noqday gole lagaga doodo arrimaha la xiriira maamulka Soomaaliya.

Muxaadarooyinkii la soo jeediyay waxay ahaayeen kuwo waxtar u leh in Soomaalida laga qaybgeliyo khiyaaraadka mustaqbalka Soomaaliya. Goluhu wuxuu sii xoojiyay midnimada TFG iyo ARS. Labada kooxood waxay meel iska dhigeen khilaafaadkooda waxayna go'aansadeen inay u wada shaqeeyaan iyagoo ah hal xukuumad.

Soomaalidu waxay ka faalloodeen sida shirku u noqday gole keliya oo mideeyay waxgaradka Soomaaliyeed iyo kooxaha siyaasadda si ay uga doodaan aayaha Soomaaliya. Wuxuu noqday fursad lagu sameeyo sarena loogu qaado xiriirka ka dhexeeya Soomaalida ku nool dalka dibaddiisa iyo kuwa jooga dalka gudihiisa si dadaal loogu bixiyo xallinta dhibaatooyinka soo wajaha. Goluhu wuxuu Soomaalida ka qaybgeliyay doodo qotodheer oo macne weyn leh oo la xiriira khiyaaraadka maamulka Soomaaliya. Waxaa caddaatay in loo baahanyahay hoggaan dadka Soomaaliyeed ku qanciya inay u adeegi doonaan oo aan dhib u geysan doonin si kalsooni loo abuuro. Waxaa la isla gartay in nabad dhisiddu ay tahay waddada ugu muhimsan oo Soomaaliya hormarin karta. Waxaa la arkay in nidaamka federaalka Soomaaliya laga hirgeliyo waxay ku xirantahay in dib loo dhiso maamulladii gobollada oo laga shaqeysiiyo.

Doodaha waxaa ka caddaatay in loo baahanyahay in dib loo dhiso sharaftii Soomaaliya. Dooduhu waxay dheliyeen rajo ah in Soomaaliya federaal laga dhigi karo. Waxaa laga baarandegay khiyaaraad la hirgelin karo iyo waaya arag wanaagsan ee Soomaaliya.

## Talooyinka Fadhiyada Ka Soo Baxay

Talooyinka waxay ka soo baxeen doodihii lagu yeeshay muxaadarooyinkii fadhiyada kala duwan lagu soo jeediyay.

### 1. Talooyin: Hababka xukunka: Federaalka, midnimada iyo nidaamyada kale

Talooyinka aqoonyahannada

- ✓ Waa in laga fikiraa inta nidaam federaal ahi uu Soomaaliya ku kaalmayn karo inay gaarto ujeeddooyinkeeda ee aan loo aqbalin nidaam federaal ah keliya wuxuu ku qoran yahay Cahdiga Federaalka Ku Meel Gaarka awgeed.

Talooyinka khubarada adduunka ee mawduuca ku xeeldheer

- ✓ Dastuurku waa inuu ka tarjumaa taariikhda iyo dhaqanka Soomaaliya.
- ✓ Waa in dastuurka lagu kordhiyaa qodobbo ka hadlaya kala guurka laga guurayo habkii hore ee loo guurayo hab cusub si la isaga ilaaliyo awoodda oo lagu murmo.
- ✓ Waxaa la soo jeediyay in la dejiyo nidaam dowlad midaysan ah oo ah federaal u yaal ama nidaam maamul baahsan leh oo ay gobolladu leeyihiin ismaamul hoose, oo ay dowladda dhexena ay gacanta ku hayso dhaqaalaha.
- ✓ Waa in la garowsadaa dhibaatooyinka taariikh ahaan kicinyay muranka awoodda u dhexeeya madaxweynaha iyo ra'iisal wasaaraha oo xilalkooda kala duwanna dastuurka lagu qeexo.

Talooyinka ergooyinka Soomaaliyeed

- ✓ Waa mas'uuliyadda ergooyinka inay ka doodaan hab maamulka ugu wanaagsan ee Soomaaliya ku habboon oo ka soo baxa Soomaalida laftooda.
- ✓ Waa in la billaabaa hawsha dib-u-heshiisiinta Soomaaliyeed.
- ✓ Nidaamka ugu wanaagsan ee Soomaaliya lagu dhaqo waa nidaam maamul baahsan oo welina leh dowlad dhexe oo xoog leh.
- ✓ Waa in la dejiyaa qorshe shaqo si loo xaqiijiyo dastuurku inuu noqdo mid loo wada dhan yahay.

## 2. Talooyin: Xaqiiqada qabiilka – saameynta ay ku leedahay nidaamyada xukuumadda mustaqbalka

Talooyinka khubarada adduunka ee mawduuca ku xeeldheer

- ✓ Dowlad ku dhisan hab qabiil ma shaqayn karto. Sunnada Nabiga (SCW) waxay reebtay qabiilaysiga.
- ✓ Dowladdu waa inaan qabiil lagu saleynin, maxaa yeelay taasi waxay keeni kartaa kala qaybsanaan oo ma keenayso midnimo.
- ✓ Qabiilka waa arrin xaqiiqo ah oo aan la iska indhatiri karin ee ka jirta bulshada Soomaaliyeed. Markaa waa inay dowladdu dastuurka wax uga qabataa.
- ✓ Soomaalida laftooda waa inay xalliyaan dhibaatada Soomaaliya ka jirta.

Talooyinka ergooyinka Soomaaliyeed

- ✓ Habka 4.5 ee hadda jira ma shaqayn karo. Waxaa loo baahanyahay in horey loo socdaa oo la hormariyaa muwaadinnimo loo simanyahay oo laga fogaado kala qaybsanaanta qabiilka.
- ✓ Waxaa loo baahanyahay in laga fikiro sida nidaamka xukunku u saameeyo metelaadda haweenka, sida wax looga qabanayo takooridda ka dhanka ah haweenka, sida loo xaqiijiyo fursado siman, metelaad lagu yeesho go'aan gaaridda iyo saameynta ragga iyo dumarka.
- ✓ Waa in la fahmaa sida ay qabyaaladdu waxyeello ugu geysatay kartida Soomaalidu u lahayd inay qayb ka qaataan dhisidda bulsho midaysan.
- ✓ Waxaa loo baahanyahay in la horumariyo muwaadinnimo siman, maxaa yeelay hadda waxaa la rumaysanyahay in qabiil kasta uu ka sarreeyo midka kale.

## 3. Talooyin: Federaalka Maaliga – Khiyaaraadka iyo Saameynta

Talooyinka khubarada adduunka ee mawduuca ku xeeldheer

- ✓ Dowladdu waa inay lahaataa aragti ay ku taageerto danaha kooxaha liita iyo kuwa aan waxba la siinin iyadoo khayraadka si siman u qaybinaysa.
- ✓ Heerka qaran ee dowladda waxaa la siin karaa awoodda ururinta iyo maamulidda canshuuraha iyadoo ka wakiil ah heerarka hoose.
- ✓ Bixinta lacagaha waxaa loo qaybsan karaa iyadoo lagu saleynayo hab caqligal ah oo la raacayo jid lacagta loogu qaybiyo gobollada kala duwan iyadoo la adeegsanayo sinnaanta maaliyadeed.

Talooyinka bulshada caalamiga

- ✓ Waa in la darsaa hab deeq oo isku duuban oo xaddidaya inta ay la egtahay lacagta loo qaybin karo heerka dowlad goboleedka si loo helo wadahadal ballaaran iyo hufnaan ama furfurnaan.
- ✓ Waa in lagu fikiro sida heerarka hoose ay deenta uu qaataan si la isaga ilaaliyo khatarta ay in deyn bixin loo shaqeeyo taas oo curyaamin karta dhaqaalaha.
- ✓ Waxaa loo baahanyahay in laga fikiro horumarinta tayada ee diyaarinta waxbixinta lacageed.
- ✓ La xisaabtanku waa furaha guul ku hirgelinta federaalka maaliga.

Talooyinka ergooyinka Soomaaliyeed

- ✓ Waa in la darso canshuuraha hore loo wado iyo kuwa gadaal loo wado.
- ✓ Nidaam dhan walba eega oo isku dheellitirnaan qotoma ku leh heerka federaalka ayaa lagama maarmaan u ah canshuur ururin waxtar leh. Waa in mudnaanta koowaad la siiyaa xukunka sharciga iyo dib u soo celinta ammaanka marka dastuurka laga doodayo si aan canshuuraha loo musuqmaasuqin.
- ✓ Waa in laga fikiraa hab wadaag ah ee nidaam laba aqal leh oo labada aqal si xaq ah oo siman ay awoodda u wadaagaan.
- ✓ Hagaajinta lagu sameeyo canshuurta ganacsiga caalamiga, canshuuraha dekadaha, iwm, waa inuu u fiirsadaa inta ay la egtahay lacagta dowladda dhexe ku bixiso kana soo gasha ganacsiga. Khiyaar meesha ku jira waxaa weeye in la eego sida ay gobolladu u kala saboolsanyihiin.
- ✓ Khiyaar kale waa hab shardi ku xiran oo ay isafgarad ku gaaraan heerarka dowladda dhexe iyo

gobollada. Waxaa laga yaabaa in xiriirkan uu yahay mid hadda uun soo ifbaxaya oo aan weli wax ku ool noqonin.

## 4. Talooyinka: Sameynta Guddiyada uu Cahdigu qoro - Xudduudaha, Doorashada, Tirakoobka & Ururinta macluumaadka

Talooyinka khubarada adduunka ee mawduuca ku xeeldheer

- ✓ Dhismaha maamulka doorashooyinka waa ka mid noqon kara hay'ado kala duwan, qaarkood ay si gooni ah ula xiriira doorashooyinka, kuwo kalena xilal intaa ka ballaaran leh.
- ✓ Dowladdu waa inay sameyso hay'ad kormeer oo madaxbannaan oo joogta ah.
- ✓ Waa in laga fikiro hab khilaafka iyo muranka la xalliyo.

Talooyinka ergooyinka Soomaaliyeed

- ✓ Waa in la kala saaro xilalka siyaasadda iyo kuwa farsamada.
- ✓ Waa in la billaabo diyaarinta hal hay'ad intaan arrimaha siyaasadda la soo bandhigin ka hor.
- ✓ Waxaa loo baahanyahay tusaale Soomaaliyeed oo fariid ah ama soocan.
- ✓ Waa in la sameeyo guddiga runta iyo dib-u-heshiisiinta oo wax ka qabta ku tumashada xuquuqda aadanaha.
- ✓ Waxaa loo baahanyahay in lala shaqeeyo warbaahinta inta la diyaarinayo guddiyada si loo helo hufnaan iyo wadahadal. Waa in laga fikiro aqoon iyo waaya aragtinimo oo la socota metelaad.
- ✓ Doodaha waa in loo qaadaa heerka dadweynaha oo ay bulshada caalamiga laga helayo khibrad keliya. Lahaanshaha arrinta waa in ay Soomaalidu yeelato.
- ✓ Tirada ugu sarreysa ee xubnaha waa in la xeereeyo, oo ay ka mid tahay habka lagu soo xulanayo sida ay go'aamiyeen golaha wasiirrada oo u dhan.
- ✓ Xulashada xubnaha waa in loo eego mudnaan, karti, waaya aragtinimo iyo muwaadinnimo wacan.
- ✓ Waa inay jirto xudduud sharci oo xoog leh intaan doorashada la qaban – hal ama laba sanno ka hor.
- ✓ Waxaa lagama maarmaan ah in la kala saaro qaybaha siyaasadda iyo maamulka, guddiyadu waa inay ahaadaan kuwo farsamo keliya.
- ✓ Xudduudo sharci iyo siyaasad waa shardi lama huraan u ah doorashada. Waxaa loo baahanyahay ugu yaraan hal sanno oo diyaargarow ah si doorashada loo qabto.
- ✓ Guddiga doorashadu wuxuu u baahanyahay inuu dhiso tayadiisa si uu uga qaybqaato doorasho lagu kalsoonaan karo.
- ✓ Guddiyada waa in dib loo curiyo ee aan lagu metelin habka 4.5 keliya.

## 5. Talooyinka: Hay'adaha Fulinta, Sharcidejinta, Garsoorka, Federaalka, kuwa midaysan iyo kuwa Maamul Baahsan

Talooyinka bulshada caalamiga

- ✓ Kala saaridda awoodaha waa lama huraan si loo xakameeyo si xun u isticmaalidda iyo ku takrifalka awoodda. Hab federaal ah ayaa xaqiijin doona kala saaridda awoodaha heerarka federaalka iyo kuwa dowlad goboleedyada.
- ✓ Waa in nidaamka maxkamadaha si degdeg ah loo sameeyo.

Talooyinka khubarada Soomaaliyeed ee mawduuca ku xeeldheer

- ✓ Dowladda dhexe waxaa looga baahanyahay inay bixiso hagid iyo taageero si loo sameeyo maamul baahsan oo guuleysta.

Talooyinka ergooyinka Soomaaliyeed

- ✓ Waxaa loo baahanyahay in si feejigan loo xusho nidaam faa'iido u leh xaaladda Soomaaliya. Waxaa muuqata in hab maamul baahsan uu yahay khiyaarka ku habboon Soomaaliya, maxaa yeelay wuxuu dalka ka badbaadinayaa burbur wuxuuna dadweynaha u ogolaanayaa inay xiriir dhow dowladda la yeeshaan.
- ✓ Kala saaridda awoodaha waa lama huraan.
- ✓ Waxaa loo baahanyahay nidaam cad oo ku saleysan awood siyaasadeed oo urursan iyo maamul baahsan.
- ✓ Waxaa loo baahnaan doonaa hoggaan xoog leh si loo hirgeliyo nidaamka la doortay oo la isaga ilaaliyo guuldarro.
- ✓ Dooddu waxay u baahantahay waqti dheeraad ah si loo abuuro wacyi ku wajahan saameynta qabyaaladdu ku leedahay Soomaaliya.
- ✓ Waxaa laga yaabaa in nidaam laba nooc ee maxkamad uu yahay mid kharash badan iyadoo la

eegayo dadka shaqaalaha loo baahanyahay.

- ✓ Hoggaanku waa arrin muhim u ah hawsha dastuur dejinta si dadka dhab ahaan loo metelo codkoodana loo dhegeysto.
- ✓ Waxaa loo baahnaan doonaa waxbarasho madani ah oo dadka lagu barayo kaalintooda iyo mas'uuliyaadkooda si uu u dhaco isbeddel bulsho.
- ✓ Mas'uuliyadda hawsha dastuurka waxaa iska leh Soomaalida laftooda, gaar ahaan hirgelinta.

## 6. Talooyinka ku Saabsan Nidaamyada Dowladda ee Habboon oo ay ka Mid Yihiin Federaalka, iyo Saameynta uu Mid Kasta ku Leeyahay Soomaaliya

Talooyinka khubarada adduunka ee mawduuca ku xeeldheer

- ✓ Waa in laga fikiro dhammaan kharashaadka dowladda: isticmaalka, maalgelinta, iyo kharashaadka kale.
- ✓ Siyaasadda maaliyadeed waa inay sare u qaaddo kobcidda dhaqaalaha, hagaajiso heerka nolosha, wax ka qabato shaqa la'aanta oo xakamayso sicir bararka.
- ✓ Waa in ay jirto siyaasad lacageed oo leh xafiisyo qorsheyn iyo misaaniyad.
- ✓ Waa in la sameeyo nidaamka kaydka federaalka.
- ✓ Soomaaliya waa in ay dib ugu noqoto habka 4.5 ee shaqaalaha oo raadiso siyaabo kale oo lagu qiimeeyo oo lagaga faa'iideysto shaqaalaha oo shaqo qoriddana lagu saleeyo karti iyo mudnaan.

Talooyinka ergooyinka Soomaaliyeed

- ✓ Waxaa loo baahanyahay Soomaalidu inay wax ka bartaan dalalka ay ku noolyihiin.
- ✓ Waxaa la joogaa waqti uu jiilka cusub hoggaanka qabto, iyadoo talo ka qaadanaya jiilkii hore.
- ✓ Soomaalidu waa inay isugu yimaadaan hawl ay iyagu horkacayaan si ay keligood u go'aansadaan nidaamka la habboon.
- ✓ Dadka qurba joogta ah waxay dareemeen in nidaamka 4.5 uu u fiican yahay madaxda ee uusan u fiicnayn dadweynaha.
- ✓ Nidaam federaal ahi wuxuu ogolaanayaa dabacsanaan. Waxaa jirta xaalado ay dowlad goboleedyadu ay khiyaar u yeelanayaan inay noqdaan dowlado madaxbannaan. Taasna waxay cadaadis ku saaraysaa heerka qaran inuu wax u qabto dowlad goboleedyada si ayna u dooranin inay go'aan.
- ✓ Furfuridda awoodaha kuwa siman ama aan sinnaynba waa khiyaar la qaadan karo. Dhibaatadu ma aha nidaam midaysan. Dhibaatadu waxay salka ku haysaa musuqmaasuq iyo ku tumashada xuquuqda aadanaha.
- ✓ Dib-u-heshiisiinta waxaa looga hadlay inay tahay shardi ka horeeya qaadashada nidaam kasta.
- ✓ Ergooyinka Soomaaliyeed waxay soo jeediyeen in bandhigan lagu soo gabagabeeyo sameynta guddi dib u eega tusaalooyinka lagu soo bandhigay fadhi hawleedka oo soo saara nidaam dhab ahaan loo hirgelin karo dhab ahaana loo maalgelin karo.

# Talooyinka Ka Soo Baxday Seddaxda Koox Shaqo Ee Soomaaliyeed

## 1. Talooyinka iyo welwelka looga hadlayo nidaamka federaalka waxaa eegay koox shaqo:

- ✓ Waxaa lagu nuuxnuuxsaday in loo baahanyahay nidaam garsoor ee xoog badan oo madaxbannaan.
- ✓ Hawl dib-u-heshiisiin waa inay ka horeyso hirgelinta federaalka, haddii kale caqabad bay noqonaysaa;
- ✓ Danaha dolwlad goboleedyada waa in lagu metelo baarlamaanka.
- ✓ Waxaa loo baahanyahay hab dhexdhexaadin lagu xalliyo murannada sharciga;
- ✓ Waa in laga hadlo mabaadi'da shanta ee federaalka;
- ✓ Waa in la xaqiijiyo lana dammaanaad qaadaa daryeelka bulshada;
- ✓ Waa in sare loo qaado maamul hoosaadka heerka degmooyinka iyo gobollada;
- ✓ Waa in laga hadlo sida loo tixgelin lahaa rabitaanka gobollada, magaalooyinka ama degmooyinka aan rabin inay ku biiraan heerka dowladda dhexe;
- ✓ Awoodda maamul ee la siiyo heerka hoose waa inuu hagaa mabda'a u dhaweynta adeega dadka loo adeegayo;
- ✓ Waa in si cad loo qeexo muwaadinnimada, dadka laga tira badan yahay iyo xuquuqdooda;
- ✓ Nidaamka federaalku aad buu u kharash badan yahay in la hirgeliyo, markaa sidee baa loogu helayaa taageero maaliyadeed?
- ✓ Federaalka waa in si cad loo qeexo oo lagu saleeyo gobollada oo aan lagu saleynin qabiillada.
- ✓ Si dowlad goboleedyada federaalka la isugu keeno – khiyaaraadka soo socda waa in lagu fikiraa: (a) in lagu saleeyo 8 gobol sida ay ahayd xudduudihii gobollada maamuleed ee sannadkii 1960; (b) in uu noqdo federaal ka kooban laba dowlad goboleed oo ah Waqooyi iyo Koonfur;
- ✓ Mabaadi'da isu-dheellitirnaanta iyo sinnaanta waa inay hagaan hirgelinta federaalka maaliga iyo siyaasadda dhaqaale;
- ✓ Waxaa loo baahanyahay waxbarasho madani iyo wacyigelin;
- ✓ Waa in la raaco axkaamta Qodobka 2aad ee Cahdiga;
- ✓ Go'idda, oo ah cabsida ugu weyn ee laga qabo fikradda federaalka waa in sida ugu cad loo qeexo oo si hufan looga hadlo;
- ✓ Habka awood qaybsiga 4.5 waa in gebi ahaanba la ciribtiro;
- ✓ Waa in la dejiyo xuquuqda doorashada oo xaddidaysa xuquuqda iyo waajibaadka codbixiyeyaasha;
- ✓ Waxaa la eegay faa'iidooyinka nidaamka midaysan: a) kharash yaraan, b) hawlaha go'aan qaadashada oo degdeg ah;
- ✓ Waa in la iska ilaaliyo qabyaaladda oo la siyaasadeeyo;
- ✓ Dhammaan heshiisyada labaalaha ah (ka dhexeeya laba dowladood) iyo kuwa caalamiga waa in dowladda federaalka loo daayo;
- ✓ Xukuumadda dowlad goboleedka iyo awoodaha degmooyinka waa in si cad loo qeexo;
- ✓ Wax ka beddelidda dastuurka dowladda federaalka waa inay dowlad goboleedyadu ansaxiyaan;
- ✓ Waxaa la soo jeediyay in la assaaso guddiyo dheeraad ah: guddiga anshaxda qaranka, guddi qaran ee diinta iyo waafaqsanaanta Islaam; iyo guddi madaxbannaan ee la dagaallanka musuqmaasuqa ee heerarka oo dhan;
- ✓ In muddada xilka madaxweynaha lagu soo koobo laba jeer oo midkiiba uu yahay 4 sanno;
- ✓ Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka waa in loo dejiyo gunnooyin iyo macaash u qalma oo sharaf leh si loo xaqiijiyo hoggaan heer sare ah.

## 2. Koox shaqo ayaa qiimaysay waxay yihiin arrimaha ugu muhimsan nidaamka federaalka ee ay rabaan inay ku arkaan Cahdiga. Tobankan waxyaabo ee soo socda ayaa lagu taliyay:

- ✓ Midnimada, gobanimada iyo dhulka Soomaaliya waa laguma xadgudbaan.
- ✓ Nidaam dowlad oo aad u maamul baahsan oo isu-dheellitirnaan leh.
- ✓ Islaamku waa diinta qaranka, diimo kale dalka laguma faafin karo.
- ✓ Xoojinta mabaadi'da Islaamka iyo dhaqanka

suuban ee Soomaalyeed.

- ✓ Shareecada Islaamku waa isha asaasiga ee sharcidejinta qaranka.
- ✓ Xubnaha golaha wasiirrada waxaa laga soo xulanayaa gudaha iyo dibada baarlamaanka.
- ✓ Qodobbada Cahdiga Federaalka Ku Meel Gaarka iyo dastuurka waa in si buuxda oo sax ah looga hirgeliyo dhammaan heerarka dowladda.
- ✓ Sameynta Maxkamadda Dastuurka Qaranka.
- ✓ Waa in hufnaan iyo isla xisaabtan ay ka jiraan dhammaan heerarka dowladda.
- ✓ Dib-uheshiisiin dhab ah oo dhammeystiran oo ka dhacda heerarka oo dhan.

## 3. Koox shaqo ayaa aqoonsatay arrimaha mudnaanta la siiyo oo looga hadlayo qaybahan soo socda:

### Caddaaladda & Hay'adaha

- ✓ In la diyaariyo goobo nabadda lagu dhiso oo ay ka mid tahay habka xallinta khilaafaadka, dib-uheshiisiinta iyo dib-udejinta.
- ✓ Xukunka sharcigu waa inuu keeno ilaalinta xuquuqda aadanaha ee dadka oo dhan iyo ciqaab ku habboon ee sharciga waafaqsan.
- ✓ Sameynta nidaam garsoor oo madaxbannaan, booliis, maxkamado iyo hay'ado maamula xabsiyada, horumarinta xuquuqda aadanaha, dib-udejinta iyo dib isugu keenidda.
- ✓ Hoggaanka muddada kalaguurka waa mudnaan lagu saleeyo.
- ✓ Sameynta goobo soo saari kara hoggaan waxtar leh.
- ✓ Sameynta hay'adaha tababarka hoggaanka.
- ✓ Xoojinta hay'adaha bulshada rayidka oo ka warbixin kara oo kormeeri kara si loo xaqiijiyo islaxisaabtan iyo hufanaan.

### Nabad dhisid

- ✓ Sameynta hab hoos laga soo billaabo oo kor la aado iyo mid kor laga soo billaabo oo hoos la aado.
- ✓ Dadka rayidka ah ee waxtarka ah waa in laga qaybgeliyaa: hoggaamiyeyaasha diinta, odayaasha dhaqanka, kooxaha dumarka xirfadleyda ah, iwm.
- ✓ Guddiyada runta iyo dib-uheshiisiinta waa in laga sameeyo heer kasta.
- ✓ Bulshooyinka dhexdhexaadka ah waa in kaalin laga siiyo hawsha nabad dhisidda.
- ✓ Nabad dhisiddu waa inay ku saleysnaato qiyamka bulshada iyo dhaqanka.
- ✓ Horumarinta waxbarashada nabadda.
- ✓ Haweenka oo si dheeraad ah uga qaybgala hawsha nabad dhisidda.
- ✓ Xaddididda ama yaraynta faragelinta shisheeye ee hawsha nabadda.
- ✓ In la ogaado shakhsiyaadka mas'uul ka ah denbiyada dagaalka iyo denbiyada aadanaha ka dhanka ah.

### Arrimaha Bulshada – Jinisiga ragga iyo dumarka

- ✓ Arrinta Jinisiga ee ragga iyo dumarka waa inay noqoto arrin dhan kasta taabata.
- ✓ Waa in la dhowro qayb boqolkiiba 30 oo loo qoondeeyo dumarka heer kasta oo ah hawsha go'aan qaadashada.
- ✓ 4 billood oo ah fasax umuleed oo mishaarkoodana la bixiyo.
- ✓ Sameynta nidaam waxbarasho oo aan rasmi ahayn.
- ✓ Qaadidda tallaabooyin looga hortago dhibka loo geysto dumarka.
- ✓ Baabi'inta xeer dhaqameedyada xunxun.

### Arrimaha Bulshada – Tirayarta

- ✓ Qeexidda tirayarta xaaladda Soomalia.
- ✓ Ilaalinta xuquuqda tirayarta.
- ✓ Tirtiridda habka 4.5
- ✓ Dejinta sharciyo la dagaalama kala soocidda iyo cadaadidka.
- ✓ Horumarinta waxbarashada madaniga.
- ✓ Awoodsiinta kooxaha tirayarta ee dhan kasta.

### Arrimaha Bulshada – Qabiilka

- ✓ Sameynta ururo bulsho iyo xirfadeed oo qabyaaladda beddela.
- ✓ In la abuuro aqoonsi juquraafi ah.
- ✓ Tirakoobka dadka (diiwaangelinta dadka dalka deggan) waa in mudnaan la siiyo.
- ✓ Waa in la sameeyo nidaam qabyaaladda meesha ka saara oo beddela habka 4.5
- ✓ In la yareeyo u adeegsiga qabiilka hawsha siyaasadda inta lagu jiro muddada kala guurka.
- ✓ In la raadiyo jid habboon oo xaqiijin kara metelaad xaq ah oo loo siman yahay.

### Hay'adaha Dhaqaalaha

- ✓ In sare loo qaado oo la dhowro siyaasadda dhaqaalaha suuqa xorta ha.

- ✓ Xoolaha la wada leedahay waa in dowladda loo soo celiyo.
- ✓ Xoolaha gaarka ah waa in dadkii lahaa loo celiyo.
- ✓ Ilaalinta kheyraadka qaranka iyo xoolaha la wada leeyahay.
- ✓ Kaalmada shisheeye iyo canshuuraha gudaha ka soo xarooda waa in loo adeegsado dib uhabeynta waxsoosaarka qaybaha soo socda: beeraha, kalluumeysiga, xannaanada xoolaha nool, kaymaha iyo warshadaha.
- ✓ Kaalmada shisheeye ee la helo waa in lagu maamulo hufnaan oo madaxdana lagula xisaabtamo si loo xakameeyo dhunsiga xoolaha umadda.
- ✓ Siyaasadaha dhaqaalaha, kuwa canshuuraha waa inay yihiin kuwo caddaalad ah, horusocod ah oo bartilmaameysta yaraynta saboolnimada iyo dibuhabeynta laamaha dhaqaalaha.
- ✓ Sameynta bangi dhexe oo madaxbannaan oo lagu kalsoonaan karo oo laamo ku leh gobollada oo dhan.
- ✓ Waa inay jirto siyaasad ganacsi oo sare u qaadda ganacsiga xorta ah ee heer kasta.
- ✓ Dejinta siyaasad nidaamisa ilaalisana xaquuqda lahaanshaha gaarka.
- ✓ Deen fududeyn iyo codsi deeq.
- ✓ Ugu qaybinta barwaaqada gobollada iyo laamaha oo dhan si isku dheellitiran.

### Adeegyada Bulshada

Sameynta maamul guud oo waxtar leh oo bixin kara adeeg guud sida waxbarasho, caafimaad, biyo & nadaafad iyo dhismooyinka hoose, iwm.

# Jidka Hore Loogu Soconayo

Shirkan wadahadallada qaran ee ku saabsan khiyaaraadka federaalka iyo maamul baahinta ee Soomaaliya waa kii ugu horreeyay oo ka mid ah kuwo badan oo ay Qaramada Midoobay iyo wadaagayaasha caaalamiga ku taageeri karaan Dowladda Federaalka Ku Meel Gaarka si khubarada Soomaaliyeed loogu yeero oo ay uga doodaan isafgaradna uga gaaran mabaadi'da dastuuriga ee muhiimka ah. Shirkan waa kii ugu horreeyay, waxaana xigi doona kuwo badan oo mawduuca lagaga wadahadlayo iyo wadatashiyo guud oo daba jooga mawaadiicda shirka laga soo jeediyay, waxaana laga doodi doonaa mabaadi' dastuuri ah oo dheeraad ah oo ay tahay inay Soomaalidu ka dooddan oo ay lafaguraan.
Talooyinka warbixintan lagu soo jeediyay ee shirkan ka soo baxday waxay si cad u tilmaamayaan baahida loo qabo in daraasado dheeraad ah iyo falanqayn lagu sameeyo:

1. Federaalka iyo/ama maamul baahinta – Wadatashiga laga yeesho sidii loo sameyn lahaa nidaam dowladeed ee Soomaaliya gaar u ah oo ku salaysan casharradii laga bartay caalamka iyo Soomaaliya.
2. Qabiilka, Hidaha iyo Xeer Dhaqanka – Wadatashiga laga yeesho sidee bay Soomaalidu u doonayaan inay arrintan uga hadlaan si ay u qabtaan dibuheshiisiin waarta? Waa maxay waxyaabaha loo baahanyahay in lagu qoro dastuurka Soomaaliyeed?
3. Federaalka Maaliga – dhowr wadahadallo iyo wadatashi oo Soomaalida lala yeesho, iyagoo wadaagaya tusaalooyin ay bixiyeen khubaro caalami ah ee loo baahanyahay in la darso oo la lafaguro.

"Waxaan mahad u soo jeedinayaa dhammaan dadkii soo abaabulay, ka qaybgalay, qaybna ka geystay shirkan. Khubarada Soomaaliyeed waxay gudanayaan waajibkooda Soomaali ahaan; waxaan idinka filaynaa wax dheeraad ah. Xaalada hadda Soomaaliya ka jirta waxay ka dhalatay caddaalad la'aan hore u jirtay. Haddaan waaya aragnimadaas wax ka baranno waan sixi karnaa qaladaadkeena. Waa inaan dadkeena ka dhaadhicino in hoggaamiyuhu iyaga u adeego ee uusan dhib u geysan, kadib way nagu kalsoonaan doonaan. Bulshada caalamiga way ka daashay dhibaatooyinka Soomaliya; waa inaan ku taageerno si ay noogu kaalmeeyaan inaan ka gudubno dhibaatadeena. Waa inaan dhammaanteena ku dadaalno inaan nabad u keeno Soomaalia".

**Md. Shariif Xasan Sheekh Adan**

# Lifaaqa 1aad: Ajendaha

**FEDERAALKA IYO MAAMUL BAAHINTA**
**KHIYAARAADKA SOomAaliYa**
**Nairobi, Kenya**
**27-29 November, 2008**

## Xaaladda ka dambeysa

Qodobka 11 (4) ee Cahdiga Federaalka Ku Meel Gaarka wuxuu tilmaamayaa "Dowladd Federaalka Ku Meel Gaarka waxay xaqiijinaysaa in hawsha lagu dhisayo dowlad federaal ah ee Soomaaliya ay ku dhacdo muddo laba sanno iyo bar ah laga billaabo taariikhda guddiga la sameeyay;"

Bishii Maayo ee sannadkii 2006 Xafiiska Siyaasadda Qaramada Midoobay u qaabilsan Soomaaliya (UNPOS), isagoo la kaashanaya Xafiiska Guddoomiyaha Baarlamaanka Federaalka Ku Meel Gaarka ee Soomaaliya wuxuu siminaar aqoonisweydaarsi ah oo shan maalmood socday kuna saabsanaa Federaalka iyo Arrimaha Dastuurka magaalda Baydhabo ugu qabtay Baarlamaanka Federaalka Ku Meel Gaarka ee Soomaaliya. Mawduuca siminaarka lagaga dooday lana doonayay inuu ka soo baxo siminaarka wuxuu ahaa " Federaalka – habka iyo sida awoodaha iyo khayraadka loo qaybsado" waxaana la doonayay inay xildhibaannadu "arkaan dhismaha nidaamka federaalka iyo weliba arrimo muhim ah oo dastuuri ah sida mabda'a kala saaridda awoodaha, furfuridda awoodaha, nidaamka dowladda baarlamaaniga iyo midda madaxtooyada ah, iwm" 2

Iyadoo laga ambaqaadayo heshiiskii nabadda dhowaan Jabuuti lagu gaaray iyo hawsha dastuur qoridda hadda socota, go'aan gaarayaasha Soomaaliyeed waxay aqoonsadeen in loo baahanyahay in la qabto shir hawleed lagaga doodayo 'Federaalka iyo maamul baahinta – khiyaaraadka Soomaaliya'. Arrintan waxaa taageeray UNPOS iyo UNDP waxayna ku ballanqaadeen inay qabanqaabiyaan.

## Ujeeddada shirhawleedka

Ujeddada shirka waa in loo yeero go'aan gaarayaasha siyaasadda, khubarada ku xeeldheer mawaadiicda (federaalka, dastuurka, sharciga, dhaqaalaha, culuumta bulshada, iwm) oo ka socda Soomaaliya iyo qurbahaba, si ay u yeeshaan dood qoto dheer oo ay dib ugu eegaan khiyaaraadka dhici kara lana doonayo iyo inay ka doodaan oo ay qiimeeyaan hab dowladeedka ugu habboon Soomalia – federaal, mid midaysan ama kuwo kale.

## Natiijada laga filayo

Sameynta saddex/afar koox shaqo (oo ay ku jiraan xubnaha mucaaradka) oo soo diyaariya hawl shaqo oo si qotodheer dib loogu eego talooyinka ugu muhimsan ee shirka. Markaa kooxaha shaqo waxay warbixntooda u soo gudbin doonaan Guddiga Heerka Sare oo horeba Jabuuti loogu sameeyay.

## Soo jeediyeyaasha: Khubaro Soomaaliyeed iyo kuwo caalami ah.

## Qabanqaabiyeyaasha/garwadayaasha dooda: khubaro Soomaaliyeed.

## Ka qaybgalayaasha: Ra'iisalwasaaraha, wasiirro, xildhibaanno, Guddiga Dastuurka IFCC iyo dad kaloo arrinta khusayso oo ka socda qurbaha, Qaramada Midoobay, khubaro caalami ah – ku dhowaad 70 qof.

## Ajendaha oo tifaftiran

**Arbaco, 26ka Nofembar**

| | |
|---|---|
| 7:00 – 9.00 s.n. | Xaflad soo dhoweyn<br>**Waterfall area, Safari Park Hotel** |
| **Khamiis, 27ka Nofembar** | Bourgainville meeting room |
| 9:00 s.n. | Duco |
| 9.00 – 9.10 s.n. | **Hadal furid ah iyo soo dhoweyn**<br>Md. Nuur Xasan Xuseen 'Nuur Cadde', Ra'iisalwasaaraha |
| 9:10 - 9: 30 s.n. | **Soo dhoweyn ka socota UNPOS iyo UNDP**<br>Md. Bruno Mpondo, UNPOS oo ka wakiil ah Amb. Ahmadou Ould Abdallah, Ergeyga Gaarka ee Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay (SRSG)<br>Md. Mark Bowden, Isuduwaha Degan, UNCT<br>Md. Bruno Lemarquis, Agaasimaha Xafiiska waddanka, UNDP Soomaaliya |
| 9:30 – 11:00 s.n. | **Fadhiga kowaad: Hababka Nidaamyada Federaalka (iyo kuwa kale)1**<br>*Fadhigan wuxuu keeni doonaa xaaladda guud iyo macluumaad taariikheed oo ku saabsan noocyada federaalka, dowlad midaysan iyo nidaamyada kale iyadoo ay la socdaan tusaalooyin laga soo qaatay Afrika iyo gobollo kale. Sidoo kale, wuxuu hoosta ka xarriiqi doonaa sida tusaalooyinkan iyo duruustii laga bartay ay u qiimeyn lahaayeen go'aan gaarayaasha Soomaaliyeed. Ka qaybgalayaashu waxay ka doodi karaan ammaanta iyo ceebaha ay leeyihiin tusaalooyinka iyo nidaamka ku habboon Soomaaliya.*<br><br>**Guddonka:** Md. Walid Musa, Agaasimaha, Xafiiska Siyaasadda, UNPOS<br>**Soo jeediyeyaasha:** Md. Cumar Salaad, Dr Markus Böckenförde,<br>**U jawaabayaasha:** Md. Axmed Isaaq, Dr Maxmuud Cali Turiare, Ms Jill Cottrell |
| Dood loo wada dhan yahay | |
| 11:00 – 11:15 s.n | Fasax shaah |
| 11:15 – 1:00 pm | **Fadhiga labaad: Xaqiiqada qabiilka – Saameynta uu ku leeyahay nidaamka dowladda mustaqbalka**<br>*Fadhigan soo jeediyeyaashu waxay la iman doonaan sharaxaad Soomaaliyeed o o laga bixiyo xaqiiqada qabiilka iyo saameynta uu ku leeyahay khilaafka haddan taagan ee wadahadallada nabadda, hawsha dastuur qoridda iyo xulashada habka dowladeed eek ugu habboon. Ka qaybgalayaashu waxay ka doodi karaan xiriirka ka dhexeeya xaqiiqada qabiilka iyo nidaamka dowladda, ha ahaado federaal, mid midaysan ama kuwo kaleba iyo sida ugu wanaagsan ee looga faa'iideysan karo qabiilka si dalka loogu taabbageliyo deganaan dheeraad ah ee bulsho iyo dhaqaale.* |

1 Marka fadhigan uu xirmay, koox shaqp oo yar oo ka kooban khubaro Soomaaliyeed ayaa la abuuri doonaa si ay u qoraan arrimaha asaasiga ah ee la soo hadalqaaday, oo ay taageeraan fadhiga shaqo ee maalinta seddaxaad

**Gudonka:** Md. Shariif Xasan Sheekh Adan Isaaq
**Soo jeediyeyaasha:** Prof. Cabdi M. Kuusow, Md. Cabduraxmaan Cusmaan Cabdulle 'Shuke' – waraaqda waxaa jeedin doona Md. Maxamed Jawari isagoo ka wakil ah
**U jawaabayaasha:** Md. Cabdulqadir Adan Cabdulle, Md. Cabdulraxmaan Macallin Cabdullaahi, Sukyan Xasan Cumar

Dood loo wada dhan yahay

1: 00 – 2:30 g.n — Qado

2:30 – 3:45 g.n — **Fadhiga Seddaxad: Federaalka Maaliga – Khiyaaraadka & Saameynta**

*In kastoo mawduucan aadka u adag uu u baahnyahay in loo qoondeeyo shir qaadanaya doddobaad dhan, fadhigan wuxuu soo bandhigi doonaa dulmar guud ahaaneed ee nooca arrimaha maaliga iyo khayraadka ay Dowladda qaran Soomaaliyeed oo leh gobollo ismaamulaya ku qasbantahay inay eegto. Sidoo kale, ka qaybgalayaashu waa inay ka fikiraan noocyada xudduudda sharci iyo hay'adaha qaran iyo kuwa goboleed ee loo baahanyahay in la sameeyo si loo maamulo federaalka maaliga. Doodaha dambe waxaa lagu eegi doonaa qaybinta xoolaha iyo khayraadka.*

**Guddonka:** Md. Abdulkadir Aden Abdulle
**Soo jeediyeyaasha:** Dr Mutakha Kangu, Mr Frederick Kilby,
**U jawaabayaasha:** Md. Mohamed Omar Jama, Mw. Hodan S. Isse

Dood furan

3: 45 – 4:00 gn — Fasax shaah

4:00 – 5:45 gn — **Fadhiga afaraad: Sameynta Guddiyada ku qoran Cahdiga – Xudduudaha, Doorashada, Tirakoobka iyo ururinta macluumaadka**

*Cahdiga Ku Meel Gaarka wuxuu qorayaa in la sameeyo seddax guddi ee loo baahanyahay in lagu soo nooleeyo xeer baarlamaan. Waaya aragtinimada dhisidda tusaalaha hay'ad sidoo kale ah waxaa bixin doona khabiirka doorashada Qaramada Midoobay.*

**Gudoonka:** Md. Ahmed A. Adan, Ra'iisalwasaare ku xigeenka
**Soo jeediyeyaasha:** Mr Ray Kennedy, Ms Annie Demirjian
**U jawaabayaasha:** Mrs Qamar Osman Ibrahim, Mr Farah Sheikh Abdikadir, Mr Abdirizak Osman Hasan 'Jurile'

Dood dadka u wada furan

5:45 gn — Erayo gunaanud ah: Md. Ahmed A. Adan, Ra'iisalwasaare ku xigeenka

**Jimce, 28 Nofembar**

9:00 sn — Duco

9:00 – 9:15 sn — Erayo gunaanud ah: Md Nur Hassan Hussein 'Nur Adde', Ra'iisal wasaaraha

9:15 – 9:30 sn — Koobniinta doodihii maalinta koowaad
Prof. Abdurahman Aden Ibrahim 'Ibbi'

9:30 – 11:00 sn — **Fadhiga shanaad: Hay'adaha fulinta, sharcidejinta, garsoorka, federaalka,**

**kuwa midaysan iyo kuwa maamulka baahsan**
*Mawduucan adag wuxuu u baahanyahay in keligiis shir loo qabto. Haseyeeshee, fadhigan soo bandhigi doonaa dulmar guud ee saddexda heer ee dowladda iyo habdhismaha awoodda ee nidaam federaalka, midka midaysan ama kuwa kale. Ka qaybgalayaashu waxay wax ka qaadan doonaan waaya aragtinimmada qaran iyo kuwa caalamiga.*

**Gudonka:** Md Mohamoud Haji Nur
**Soo jeediyeyaasha:** Dr Markus Boeckenfoerde, Eng. Musse Cabdullahi
**U jawaabayaasha:** Md Abdurahman Mohamoud Farah 'Janaqow', Ms Jill Cottrell,

Dood furan

11:00- 11:15 sn — Fasax shaah

11:15 – 1:00 gn — **Fadhiga lixaad: Nidaamyada dowladeed ee ugu habboon oo uu ka mid yahay federaalka iyo saameynta uu mid kasta ku leeyahay Soomaaliya**
*Muxaadarooyin iyo doodo aad diiradda loogu saarayo ayaa fadhigan lagu falanqayn doonaa. Waxaa tan ka mid ah xaaladda siyaasadeed, midda dhaqaale, midda sharci iyo midda bulsho ee gobollada maamul hoosaad leh. Waxaa intaa dheer, waxaa la soo bandhigi doonaa faa'iidooyinka iyo dhibaatooyinka hanaan federaal ah oo gobollo maamul hoosaad ee baahsan leh iyo hanaan kastoo kale ee dowladnimo.*

**Gudonka:** Md Nick Pyle, UNPOS
**Soo jeediyeyaasha:** Warqad uu qoray Prof. Ehtisham Ahmed soona jeedisay Mw Hodan S. Isse
**U jawaabayaasha:** Md Mohammed Isse 'Trunji', Osman Jama 'Kaluun',

Dood loo wad dhan yahay

1:00 - 3:00 gn — Salaadda Jumcaha

Qado

3:00 – 3:45 gn — Fadhiga lixaad oo sii socda: Hababka dowladeed ee habboon, oo uu ka mid yahay hanaanka federaalka iyo saameynta oo mid kasta ku leeyahayn Soomaaliya

Dood loo wad dhan yahay

3:45 – 4:00 gn — Fasax shaah

4:00 – 5:45 gn — **Fadhiga toddobaad: Garowsiga arrimaha u baahan in wax laga qabto si loo hirgeliyo hababka kala duwan ee dowladnimo**
*Fadhigan waxaa lagaga doodi doonaa arrimo muhim ah: siyaasadda, bulshada, dhaqaalaha, qabiilka amniga, dadka tirayarta, xuquuqda aadanaha, dumarka iyo raga, shareecada Islaamka iyo arrimaha kale ee Soomaalida dan ugu jirto. Ka qaybgalayaashu waxay ku talin karaan in la sameeyo cilmibaaris kale oo qotodheer iyo warbixin looga soo gudbiyo guddiga heerka sare.*

| | | |
|---|---|---|
| | **Gudonka:** | Md Hassan Ali Mire |
| | **Soo jeediyeyaasha:** | Md Abdi M. Kusow, Mr. Mohamed Jawari |
| | **U jawaabayaasha:** | Md Farah Sheikh Abdikadir, Dr Mohamed Ali Nur, Dr Abdinur S. Mohamud |

Dood loo wad dhan yahay

5:45 gn — Hadal gunaanud ah iyo koobniinta maalinta labaad:
Md Ahmed A. Adan, Ra'iisal Wassare ku xigeenka

**Sabti, 29 Nofembar**

9:00 am — Duco

9:00 – 3:45 sn — **Fadhi xiran: Ka qaybyalayaasha Soomaalida ah keliya**
Abaabulaha: Md Saciid Faarax, Agaasimaha, Xafiiska Dowlad Wanaag Bureau

- ✓ **Sameynta seddax ilaa afar koox shaqo oo xeeldheer (oo ay ka mid yihiin xubnaha ARS)**
- ✓ **Koobniinta doodaha kooxaha shaqo ee shirka**
- ✓ **Tallaabada xigta iyo waddada hore loogu socdo**

1:00 – 2:00 gn — Qado

2:00 - 3:45 gn — **Sii socodka fadhigii xirnaa:** Diyaarinta natiijooyinka iyo talooyinka ka soo baxay kooxaha shirhawleedka

1.00-2:00 gn — **UNPOS/UNDP qado** lala qaato bulshada caalamiga

2:00-3.45 gn — **xogwarran lala yeesho bulshada caalamiga – Qolka Bogoria**

| | | |
|---|---|---|
| | **Guddoon:** | Danj. Danj. Ahmadou Ould Abdallah, Ergeyga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee QM (SRSG)/Md Mark Bowden (dib baa laga xaqiijinayaa) |
| | **Soo jeediyeyaasha:** | Md Walid Musa, UNPOS/Mw Annie Demirjian, UNDP-Soomaaliya |

3:45 – 4.00 gn — Fasax Shaah

4:00 – 6:00 gn — **Fadhiga siddeedaad: Soo jeedinta natiijooyinka iyo doodda lala yeeshay bulshada caalamiga**

**Wada-guddoomiyeyaal:** Md. Nuur Xasan Xuseen 'Nuur Cadde', Ra'iisal Wasaaraha Danj. Ahmadou Ould Abdallah, Ergeyga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee QM (SRSG)

6.00 gn — **Hadal gunaanad ah**
Md. Nuur Xasan Xusen 'Nuur Cadde' Ra'iisal Wasaaraha
Danj. Ahmadou Ould Abdallah, Ergeyga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee QM (SRSG)
Md Mark Bowden, Isuduwaha Degan, UNDP
Md Bruno Lemarquis, Agaasimaha dalka, UNDP Soomaaliya

# Lifaaqa 2aad: Liiskaka Qaybgalayaasha

| No. | Ururka/Kaalinta | Magac |
|---|---|---|
| 1. | Khubarada adduunka oo mawduuca ku xeeldheer | James Ray Kennedy |
| 2. | | Jill Cottrell |
| 3. | | Dr Mutakha Kangu |
| 4. | | Ahmed Issak Hassan |
| 5. | | Mohamed Osman Jawari |
| 6. | | Sukyan Hassan Omar |

| No. | Ururka/Kaalinta | Magac |
|---|---|---|
| 1. | Khubaro Soomaaliyeed oo mawduuca ku xeeldheer | Osman Jama Ali |
| 2. | | Mohamoud Haji Nur |
| 3. | | Farah Sheikh Abdikadir |
| 4. | | Abdi M Kusow |
| 5. | | Omar Salad |
| 6. | | Said Farah Mohamoud |
| 7. | | Abdulkadir Aden Abdulle |
| 8. | | Mohamed Issa Trunji |
| 9. | | Abdullahi Said Osman |
| 10. | | Mohamed Omar Giama |
| 11. | | Mohamed Ali Nur |
| 12. | | Hassan Ali Mirreh |
| 13. | | Abdinur S. Mohamud |
| 14. | | Qamar Osman Ibrahim |
| 15. | | Abdurahman Moallin Abdullahi |
| 16. | | Mohamed A. Eno |
| 17. | | Dr Ali Mohamed Mohamud |
| 18. | | Mohamed Haji Mukhtar |
| 19. | | Sahra Abdi Bargadle |
| 20. | | Zahra Mohamud Koronto |
| 21. | | Farah Abdulsamed Farah |
| 22. | | Abdillahi Jama |
| 23. | | Mukhtar Abdi Dhubow (IFCC) |
| 24. | | Mohamed Muse Foley (IFCC) |
| 25. | | Halimo Jama Afrah (IFCC) |
| 26. | | Eng. Musse Cabdullahi |
| 27. | | Hodan S. Isse, |
| 28. | | Aden Osman Hussein |
| 29. | | Asha Dirie |

| | | |
|---|---|---|
| 30. | | Abdirisak Aden |
| 31. | | Dr. Ali A. Hersi |
| 32. | | Muse Ali Omar (PCC) |
| 33. | | Abdulfatah Ibrahim Rascid (PCC) |
| 34. | | Ismail Hassan Mohamud (PCC) |
| 35. | | Fatuma Ibrahim |

| No. | Ururka/Kaalinta | Magac |
|---|---|---|
| 1. | UNDP Somalia | Mark Bowden |
| 2. | | Bruno Lemarquis |
| 3. | | Annie Demirjian |
| 4. | | Khalif Farah |
| 5. | | Moe Hussein |
| 6. | | Said Ahmed |
| 7. | | Debbie Wandera |
| 8. | | Omar Aden Mohammed |
| 9. | | Abdullahi Sheikh Ali |
| 10. | | Frances Kinnon |
| 11. | | Gladys Ng'ang'a |
| 12. | | Dr. Abdullahi Sheikh Abdinoor |
| 13. | | Dr. Abdulkadir M. Alim |
| 14. | | Varsha Redkar-Palepu |

| | | |
|---|---|---|
| 1. | Xafiiska Qaramada Midoobay u Qaabilsan Soomaaliya (UNPOS) | Bruno Mpondo |
| 2. | | Nick Pyle |
| 3. | | Dr. Walid Musa |

| | | |
|---|---|---|
| 1. | Bangiga Adduunka | Fredrick Kilby |
| 2. | | Ron Isaacson |

| | | |
|---|---|---|
| 1. | Machadka Max Planck ee Qaanuunka Caalamiga (MPIL) | Bruno Mpondo |
| 2. | | Nick Pyle |
| 3. | | Dr. Walid Musa |

| | | |
|---|---|---|
| 1. | Machadka Dimuqraadiga Qaranka (NDI) | John Lovdal |
| 2. | | Mr. Edmond Efendija |

| No. | Ururka/Kaalinta | Magac |
|---|---|---|
| 1. | Isbahaysiga Dibuxoreynta Soomaaliya (ARS) | Hon. Sharif Hassan Sheikh Aden Issak |
| 2. | | Hon. Abdurahman Mohamoud Farah |
| 3. | | Prof. Abdurahman Aden Ibrahim |
| 4. | | Dr. Mohamed Ali Ibrahim |
| 5. | | Fouzia Mohamed Sheikh |
| 6. | | Dr. Mahmud Ali Turiare |
| 7. | | Mohamed Hassan Ali |
| 8. | | Mohamed Abdi Yusuf |
| 9. | | Abdyullahi Farah Qarey |
| 10. | | Asho Hagi Elmi |
| 11. | | Hussein Abdi Elmi |
| 12. | | Mohamed Ali Haga |
| 13. | | Ahmed Abdullahi Hussein |
| 14. | | Mohamed Cheikh Hassan |

| No. | Ururka/Kaalinta | Magac |
|---|---|---|
| 1. | Xafiiska Ra'iisal Wasaaraha | H.E Nur Hassan Hussein |
| 2. | | H.E Ahmed Abdisalam Aden |
| 3. | | H.E Abdiwahid Elmi Omar |
| 4. | | Abdirahman Omer Osman |
| 5. | | Amina mohamed Ali |
| 6. | | Abdulrahman Ismail Abdi |
| 7. | | Daud Nur Hassan |

| No. | Ururka/Kaalinta | Magac |
|---|---|---|
| 1. | Khubaro Soomaaliyeed oo mawduuca ku xeeldheer oo ka socda Xafiiska Ra'iisal Wasaaraha | Prof. Abukar Hassan Ahmed |
| 2. | | Prof. Mohamed Nur |
| 3. | | Dr. Hassan Mohamed Ali |
| 4. | | Awale Ali Kulane |
| 5. | | Prof. Mohamud Ali Gure |
| 6. | | Abdullahi Mohamud Mohamed |
| 7. | | Omar Abdulle Alasow |
| 8. | | Dr. Osman Jurile |

Design and Layout: Jinita Shah

Printing: Publishing Services Section, Nairobi, ISO 14001:2004 - certified

# Lifaaqa 3aad: Diiwaanka shirka iyo waraaqi-hii la jeediyay.

Haddaad doonayso inaad hesho nuqullo ka mid ah waraaqihii shirka laga jeediyay iyo diiwaanka dhamaystiran ee hawlsocodkii shirka, fadlan la soo xiriir hawlwadeennadan UNDP Soomaaliya ee soo socda si ay kuu kacan siiyaan:

Ms. Varsha Redkar-Palepu
Maamulaha Mashruuca sii haye.
Mashruuca Dastuur Dejinta Soomaaliya
E-mail: Varsha.Redkar-Palepu@undp.org
Telephone: +254 20 425 5156

Ms. Debbie Wandera
Hawl la wade mashruuc
Mashruuca Dastuur Dejinta Soomaaliya
E-mail: debbie.wandera@undp.org
Telephone: +254 20 425 5152